70

# MAXAMED SIYAAD BARRE

# FALSAFADA KACAANKA SOOMAALIYEED

# FALSAFADA

# KACAANKA SOOMAALIYEED



Jaalle Maxamed Siyaad Barre
Xoghayaha Guud ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka
Soomaaliyeed iyo Madaxweynaha J.D.S.

# TUSMO

I. KACAANKII 21KA OKTOOBAR

II. HORUKACII KACAANKU GAAREY

III. DABAQADAHA BULSHADA SOOMAALIYEED

IV. DHAQANKA BULSHADA SOOMAALIYEED

V. DIINTA IYO HANTIWADAAGGA

## SOO-BANDHIG

Marka aynu ka hadleyno Kacaanka Hantiwadaagga ah oo 21kii Oktoobar dhashay, waxaa imaaneysa su'aal ah maxaa sababay dhalashada kacaanka ? Wadcigii taagnaa dalkeenna 21kii Oktoobar horteed sidee buu ahaa? Waxay nala tahay in su'aalahaas jawaabtoodu tahay mid lagama maarmaan ah, si lagu fahmo taariikhda Kacaanka Soomaaliyeed iyo wixii sababay in uu ka curto dalkeenna. Haddaba, haddaan dib ugu noqonno taariikhda dalkeenna, waxaa la ogsoon yahay in muddadii ka dambeysey gobannimadii taas oo ahayd 1960kii ilaa iyo inta laga soo gaaro curashadii kacaanka Oktoobar, in ay ummadda Soomaaliyeed soo martay muddadaas, taariikh foolxun oo silic iyo saxariir leh. Ha ahaato xag dhaqaale ama xag dhaqan amase xag siyaaso intaba. Waxaa marxaladaas taariikhda ummaddu soo martay la oran karaa in ay ahayd midda loo yaqaan «Gumeysiga Cusub». Waxaa lagu yiqiin marxaladaas dhaqaale, dhaqan iyo siyaaso ku fadhiya qorshihii gumeysigu u dhigay dalkeenna.

Haddaan fiiro kooban u lahaanno siduu ahaa dhaqaalaha dalku muddadii tobanka sano ku dhoweyd oo xorriyadda qaadashadeedii ka dambeysey kacaankeenna ka horreysey, waxaa kuu soo baxaya dal dhaqaalihiisu heerkii ugu hooseeyey adduunka joogey.

Dhaqaalahaas waxaa si rasmi ah Ummadaha Midoobey ugu aqoonsadeen, inuu yahay mid ka mid ah 25ka dal oo adduunka ugu horukaca yar (least developed). Amase mid la oran karey waa taagnaa oo haba yaraatee wax horukac ah ma lahyan.

Sababaha dhaqaalaha sidaas ah keenay mid iyo laba waa ka badnaayeen, hase yeeshee waxaa ugu waaweynaa arrimaha soo socda.

1. Gumeysiga caalamiga ah oo doonayey in dalku uusan dib u dhaca ka bixin. Suuq badeecadiisa lagu iibiyo iyo mid laga soo saaro alaabo ceeriin oo loo iibgeeyo suuqyadiisa (sida muuska, hargaha iwm) oo keliya inuu ahaado.

2. Garasho siyaasi ah amase awood iyo niyadsami doonaya in waddanku dib u dhaca ka baxo oon jirin kana dhalan maskaxda madaxdii dalka maamuleysay muddadaas.

3. Miisaaniyad horumarinta dhaqaalaha loogu talagalay oon jirin haba yaraatee.

4. Khayraadka dhulka, beeraha, xoolaha, badda iyo macdanta oon aqoon loo lahayn kaafi ah, loona soo jeedin horumarintooda.

5. Fikradda ah in dadku iskiis wax u qabsado oo kalsooni ku yeesho awooddiisa oon jirin, lagalana diriray in ay ku abuuranto maskaxda dhallinyaradeenna.

Arrimahaasi waxay ugu waaweynaayeen sababihii hortaagnaa horukac dhaqaale oo dalku ku tallaabsado. Waxaa kolka iska cad in aan waddanna horukac dhaqaale gaari karin haddii aan hoggaanka dalka maamulaahi u soo jeedin in la dhiso dalka dhaqaalihiisa. Hoggaanka oo dalka xumaadaahi wuxuu dhaxalsiiyaa jahawareer joogto ah oon dalkaasi yeelan falsafo siyaasadeed oo hoggaamineysa tallaabooyinka laga qaadayo xagga dhaqaalaha iyo aragti fog oo xeel dheer oo u socota barwaaqaynta dalka.

Waxaa maqnaata qorsheyn dhaqaale oo sahasha dhabbaha loo marayo horudhigidda dhaqaalaha, kuna siisa aqoon lagu ogaado inta dalkaaga awooddiisu le'eg tahay, (awood maaliyadeed tu farsame yaqaan, tu qalab iyo tu alaabta ceeriin intaba, sidaan u niri aragtidaas falsafo ama siyaasadeed ma jirin dalkeenna kacaanka hortiis. Waxaad moodeysey in



halgankii gobannimadoonka ahaa dadka iyo madaxduba ay yiqiinneen halka loo socdo oo ahayd xorriyo in la helo, gumeysigana la saaro. Ha ahaatee kolkii xorriyaddii siyaasiga ahayd la helay, madaxdii dalku awood uma yeelan in ay barnaamij siyaasi ah oo cad oo lagu maamulo dhaqaalaha ummadda dejiyaan, ee jahawareer bay qaadeen ugu dambeystiina daneysi shakhsi ah, ayey arrintoodu isugu idlaatay. Waddankii iyo horukaciisiina halkaasey ku lumeen. Waxaa kale oo sidii aan soo aragnay sababihii aan soo tirinay ka mid ahaa in aan miisaaniyad horumarinta loogu tala gelin. Waddan kaayaga oo kale ah, haddaan si quman loo maamulin miisaaniyadda dalka waxaa dhici in, mushaarka shaqaalaha dawladda iyo ciidammada qalabka sida la waayo bilaha qaarkood. Sidii dhici jirtey in badan, kacaanka hortii. Kol haddii miisaaniyadda dalku masruufkii dawladda ee caadiga ahaa kafeyn weydo, waxaa iska cad in aysan suuroobi karin in laga hadlo horumarin, iyo maalgelin mashaariic, dhaqaalaha dalka qiimo u leh toona. Sidaas ayeysan miisaaniyadda dalku u ahaan jirin mid loo maamulo si waafaqsan danaha dadwneyaha Soomaaliyeed. Waxay ahayd kacaanka horti, mid loogu talagalay in la boobo oo ninkii ay u dagataaba boobo, laguna faano xatooyada xoolaha dadweynaha.

Waxaa loo aqoon jirey nacas wax ma tare ah ninkii aan ka tacban boobka lagu hayey xoolaha dadweynaha. Malaayiin aan yareyn ayaa lagu bixin jirey siyaasadda qabiilka oo foosha xumeyd hirgelinteeda. Kumanyaal kale oo kaabba qabiil, salaadiin iyo ugaasyo, dhugdhugle iyo afmiinshaar u badan, ayaa subax noolba u soo xaadiri jirtey lacag loogu talagalay in siyaasaddaas lagu bixiyo.

Xadidda xoolaha dadweynaha iyo maal-tacbadka xaaraanta ahi, waxay heerka ugu sarreeya gaari jireen, goorta doorasho soo dhawaato. Ha ahaato tu baarlamaan, tu madaxweyne amase tu dawladda xilligaas wadda arrimaha dal-

ka. Wadciga araggaas lahaa ma suuro gelin karin horumar dhaqaale iyo in kayd la dhigo, mana u soo jeedin taas.

Waxaan ayana soo aragnay in aan aqoon cilmi ah loo lahayn khayraadka dalkeenna kacaanka hortiis. Taasina waxay dhalisay in la rumeysto beentii gumeysigu boqollaalka sannadood shubayey oo ahayd in Soomaaliya tahay dal faqri ah, oon lahayn, khayraad dabiici ah oo dhalin kara dhaqaale fiican. Muddadii aynu xornimada siyaasiga ah haysannay kacaanka hortii, uma suuro gelin madaxdii dalku in ay baarid dhaqaale u yeelato beeraha, xoolaha, macdanta iyo khayraadka badda ee Soomaaliya yaalla. Kol haddii ayan jirin aqoon cilmi ah oo loo leeyahay dadkaaga tiradiisa, beeraha dalkaaga ka bixi kara, xoolaha ku dhaqmi kara iyo tarankooda, macdanta jiifta dhulka hoostiisa iyo badweynta xeebteeda aan ku nool nahay, waxa Eebbe ku beeray toona, ma suurtoobi karto, sidii hore u dhacday, in la horemariyo loona soo jeesto kor u qaadidda dhaqaalaha. Maxaa wacay qofku wixii uusan aqoon, manaafacaadkoodu waa wax ka daahan oo kale

Arrintaas ayaa waxay sabab u ahayd in Soomaaliya oo ku caan ah khayraadka xoolaha iyo beeraha, misna loo aqoonsado dal faqri ah oo dambeeya xagga dhaqaalaha.

Haddii aynu ka fiirinno xagga siyaasadda wadcigii kacaanka hortii ka taagnaa Soomaaliya, sida kan dhaqaalaha oo kale ayaa waxaa kuu soo baxaya hab «Gumeysi cusub ah oo foolxun» waxaa la ogsoon yahay axsaabtii faraha badnayd oo ka dhisneyd dalka gudihiisa iyo sidii ay siyaasadda dalka u maamuli jireen madaxda axsaabtaas, kuwoodii awood siyaasadeed lahaa iyo dawladihii dalka ka talinavey muddadaasiba.

Qaabka arrimaha ummadda loo maamuli jirey wuxuu ahaa, mid ku dhisan qabyaalad iyo daneysi cad. Axsaab-



taas oo tobanyaal gaari jirey, ma ahayn kuwo mabda' qayaxan ku fadhiyey ee aalaaba waxay ahaayeen meelo loo furfuray in si afmiinshaarnimo ah loogu dullaaltamo. Ayadoo loo gorgortamo midba kan kale intii uu ka durbaan iyo buuq badan yahay iyo inta ay le'eg tahay qabyaaladda raacsan culeyskeeda siyaasiga ahi. Habkaas axsaab ku sheegga ku dhisnaa, asii runtiisu ahayd qabyaalad foolxun ayuu ku sugnaa wadciga siyaasiga ah ee dalku. Qabyaaladdu waxay ahayd geedka ay harsato siyaasadda lagu maamuli jirey waddanka iyo meesha ay ka taranto oo laga shaandheeyo siyaasaddaasi.

Qabyaalad markii lagu maamulay waddankii, waxaa soo baxday in aysan marnaba is waafaqi karin danta guud ee qaranka iyo tan qabiilku.

Kolkii labadii danood wada socon waayeen wuxuu noqday go'aankii maamulka siyaasadda dalka ka talinayey, in la hormariyo danta qabiilka iyo tan fardiga. Halkaas waxaa ku lumay haybaddii siyaasadeed iyo danihii dhaqaale ee dalka. Markey noqotay in wax waliba il qabiil lagu eego oo lagu misaamo, waxaa dhaawacmay qarannimadii ummadda Soomaaliyeed. Waxaa god galay nabadgelyadii dadka. Waxaa batay oo shaacay fowdadii iyo qaskii. Waxaa heerkii ugu sarreeyey gaarey musuq-maasuqii iyo eexdii. Waxaa dhimatay caddaaladdii bulshada oo u dhammaatay nin tooxsi iyo gaashaanbuursi qabiil. Waxaa istaagid ku dhowaadey maamulkii dawladda. Waxaa lumay sharaftii lagu aqoon jirey qaranka Soomaaliyeed. Waxaa la waayey oo dhimatay qiiradii iyo waddaninimadii dadka. Hadal iyo dhammaantii waxaa qaranku gebi ahaantii ku sigtay in uu ku dhaco bohoshii qarka loo tegey. Xorriyaddii dhiigga loo qabayna ay ka baxdo faraha ummadda Soomaaliyeed. Qabyaaladdu waxay noqotay tabaha gumeysiga cusub, tan ugu xeesha dheer oo ummad lagu qaybiyo wadcigeenna oo kale. Si qaybintaas heer foolxun loo gaarsiiyo waxaa dhacday in xabbad laysugu

dhiibey ummaddii oo kumanyaal dad ah leysaga loogey beelihii deriska ahaa koonfur iyo waqooyi, afarta beynu jaho ee Soomaaliyeedna, dilka, dhaca, xatooyada iyo boobku waxay noqdeen arrima caadi ah oo subax walba taagan. Koley magaalooyinka waaweyn ku tahay waxaa la gaarey heer aan nabadgelyo qofna hubin in uu kula noqonayo gurigiisa koi hadduu ka soo baxo. Waxaabase dhacday in badan in laysku laayey magaalo-madaxda laftigeeda.

Wadcigaas gudaha oo sidaa u yiilley gumeysiga iyo dabadhilifkiisuna kaga raalli ahaayeen, wuxuu heerkii ugu hoos̄eeyey ee uu ku dufoobi lahaa gaarey doorashadii 1969 ee dalka ka dhacday. Doorashadaas oo siddeetameeyo xisbi ku sheeg ka qaybgashay. Natiijadeedii waxay noqotay in la mariyey khasnaddii ummadda oo loo boobay si aan la arag lana maqal. In dad fara badan lagu laayey gobollada iyo degmooyinka in aan la tixgelin haba yaraatee wixii dadka dooranayey rabey, ee ay noqotay in gar iyo gardarraba lagu soo saaro ninkii dawladdu rabtey. In laga been sheego sowdkii oo waraaqo been ah lagu guro sanaadiiq, dabadeedna laga dhigo wax dad ku fooday. Dadkaas oo sidii la wada ogsoonaa aan jirin. Heerkaas dufoobey markey gaartay siyaasadda ummaddu, nin walba oo qiiro iyo soomaalinimo ku jirtey, wuxuu jecleystay in habkaas la beddelo oo lagu beddelo mid u dhaama ummadda.

Ha yeeshee hab taagan oo dhisan si xunba how dhisnaadee, waxa beddeli kara, waa dabaqad nidaamsan awoodna u leh in ay sameyso isbeddelkaas. Dabaqadaasu waxay noqon kartey xoogsatada Soomaaliyeed oo keliya, mar haddii ay ahayd tii dhibaatadu dusheeda ku dhacaysey, kadeedka iyo dulligana lą baday. Xoogsatada Soomaaliyeed guutooyin keeda tan keliya oo u habeysneyd si ay xukunka ula wareegto waxay ahayd Xoogga Dalka Soomaaliyeed.

Xoogga Dalka Soomaaliyeed wuxuu ahaa guutada



xoogsatada ka midka ah, oon muddadii maamul xumadu dalka ka taagneyd dhexgelin qaskii iyo qabyaaladdii lagu maamuli jirey waddanka. Dhexgelid la'aantaasi waxay u suuro gelisey in uusan ku yeelan dan joogto ah xooggu habkii taagnaa, taasina waxay u oggolaatay inuu goortii loo baahday u soo gurmado, shaqaale weynaha Soomaaliyeed oo uu u soo dhiciyo xorriyadihii laga afduubay. Waxaa kale oo ayana saacideysey xoogga, in uu gebi ahaantii askar iyo saraakiilba, ka soo jeedo raacato iyo beeraley, oo uu ku abtirsado labadaas dabaqadood oo bulshada Soomaaliyeed ka mid ah.

Ciidanka Soomaaliyeed ma yeelan weligiis qoon saraakiil oo ka yimid dabaqad aan ahayn xalaalquudatada, raacatada iyo beeraleyda ah. Kuwaas oo dańahoodu yihiin kuwa shaqaalaha weyn, kuwo la mid ah. Sidaas awgeed ayey ugu suurtowdey in uu u fakaro sida ummadda dulmaneyd inteeda badan, uuna ka dhiidhiyo xumaatadii, hooggii iyo halaaggii ummaddu ku sugneyd oo isticmaarka iyo abaankiisu ku kallifeen. Kol hadduu ahaa ciidan u habeysan in uu daafaco danta ummadda iyo sharafta qaranka Soomaaliyeed, waxaa lagama maarmaan noqotay in uu Xoogga Dalka Soomaaliyeed, dhaliyo Kacaankii 21kii Oktoobar, 1969. Guddigii saraakiisha ahaa, dhaliyeyna kacaanka hantiwadaagga ah ee Soomaaliyeed, guddigaas waxaa abbaanduule geesiya iyo macallin xigmad leh u ahaa Jaalle Jeneral Maxamed Siyaad Barre.

Jaalle Siyaad, kifaaxii dheeraa oo uu soo maray xorriyadda horteed iyo qaadashadeeda dabadeedba, ayaa waxay u suurto geliyeen in uu aragti kacaannimo, waddaninimo, hantiwadaagnimo intaba leh, ku derso taariikhda ummadda, hoggaamiyana kacaanka hantiwadaagga ah ee Soomaaliyeed.

Haddaba waxaa farxad ii ah in aan u soo qadimo dadweynaha Soomaaliyeed ee u halgamaya horukiciisa, murtida buuggan ku soo aroortay, oo ah tii dadweynuhu uga bartay inuu ka dhegeysto macallinka kacaanka, Jaalle Siyaad.

**Jaalle Ismaaciil Cali Abokor**

## KACAANKII 21ka OKTOOBAR

Waxaan aamminsan nahay in dunida laba nidaam ama hab oo dawladu ummaddeeda ku dhaqdo, maahane aan mid saddexaad jirin, labadaas hab waa kan hantigoosiga iyo kan hantiwadaagga cilmiga ku dhisan. Taariikhda binu-aadmiga oo isdaba-joogtey kumanyaal sannadood iyo isbeddelkii ay keentay nolosha dadka dunidu ku nool yahay oo si isdaba-joog ah isu beddeleysey ayaa waxay suuro geliyeen in aadamigu soo maro dhabbe dheer oo taariikhi ah, oo hadba heer ku sugnaado. Heerkaas wuxuu ku jiraba hadduu ku dhaco isbeddel horusocod ihi nolosha aadamiga heer kale oo kii ka sarreeya ayey gaartaa. Taariikhdu waxay na bartay shan heer oo waaweyn oo binu-aadmigu soo maray intuu dunida ku sugnaa, kuwaas oo ah :

A) Habkii wada-noolaantii horreysey.

B) Habkii is-addoonsiga.

T) Habkii dhulgoosiga.

J) Habka hantigoosiga.

X) Habka hantiwadaagga.

Shanta heer oo midba midka kale ka sarreeyo, dunida maanta waxaa weli si buuxda looga heli karaa saddexda dambe (dhulgoosiga, hantigoosiga, hantiwadaagga) ummado ku sugan, iyo dalal dhulgoosi iyo hantigoosad isku jira ku nool, sida Afrika, Aasiya iyo Laatiin Ameerika dalal ka mid ihi weli ku sugan yihiin. Hantiwadaag waxaa ku hoos nool

maanta saddex u dhig adduunka dhiggiis 1/3 kuwaas oo ah dalalka Kacaannada Hantiwadaagga ahi ka dhasheen kana taabba galeen, intii laga bilaabo Kacaankii Oktoobar oo Ruusiya, lagu yimaado Kacaankeenna Oktoobar oo Geestaan Afrikada Bari ka curtay 1969kii.



KACAANKA MICNIHIISA :

Waxaa isweydiin iyo caddeyn u baahan Kacaan waxa uu yahay iyo siiba Kacaanka Hantiwadaagga ahi waxa uu yahay?

Kacaan waa isbeddel dhaqso leh oo dabaqad ama dabaqado mujtamaca ka mid ihi sameeyaan, si ay ku beddelaan habtaagnaa xididdahana ugu siibaan habkaas dhaqaalihiisa, siyaasaddiisa iyo dhaqankiisa, laguna beddelo hab kale oo ka duwan kii hore ee lagu jirey. watana dhaqaale, siyaaso iyo dhaqan cusub.

Kacaan wuxuu ku yimaadaa isbeddel dhaqsa leh iyo dagaal cad ee dabaqadaha mujtamaca oo diriray miduna adkaato, midna laga adkaado. Haddii aan ka soo bilawno habkii ugu horreeyey ee jiritaanka binu-aadmigu soo maray wuxuu ahaa kii aan ku magacawnay «**Wada-noolaantii hore**».

Habka kani asagoo ah kii ugu horreeyey waxaa lagu aqoon jirey in dadku ku aqdaanto qalab laga sameeyey dhagax oo uu wax ku ugaarsado, ugaarsiga iyo miraha gurashadooda ayaa nolosha iyo dhaqaalaha qofku ku xirnaayeen. Waxaa keliya oo qofku wax kula soo baxo, ama u suura geliya noloshiisa wuxuu ahaa xoogiisa oo keliya. Qalabka uu ku shaqeysanayey (dhagax iyo xooggiisa) oo keliyihi uma suura gelin karin qofka, inuu keligiis noolaado, oo isaga fillaado, dunida dhibaatooyinkeeda iyo wixii bahal iyo balaayo kale ah. Markaa qofka waxaa dantu ku kallifeysay in uu ku darmo oo bahaysto dad kale oo la mid ah. Isbahaysigaas oo keliya ayaa suura gelin jirey in la wada qaraabto (ugaar la wada doonto, mallaay la wada dabto, mira la wada gurto iwm.) oo wax hoyaadka bahda ama beesha ku filan la soo hoyo. Qalabka lagu shaqeysto iyo waxa la soo helo intuba, beesha wada nool, waa ka dhexeyn jireen. Qof asagu keligiis ugu takri fali karaana ma jirin. Markaas nin wax

gaara bursadaahi ma dhici karin oo saani ayaa loo kala qaybsan jirey waxa la soo helo.

Mar haddii ayan jirin lihi gaar ahaaneed qof lihi, waxaa cad in aan kadeed leys kadeedo iyo isku dulnoolaan qof ku dul noolaado qofka kalana ayan jirin, suuroobina karin. Taas ayaana micnaheedu yahay, in kol haddii loo siman yahay nacfiga iyo shaqadaba, nin wax gumeysta iyo nin la gumeysto oo u shaqeeya kan kalena uusan jirin. Dawladnimo iyo ciidan wax lagu jujuubaana ma jiri karin (Askar, xabsiyo iwm.). Habkaasi isbeddel kuma baabi'in, maxaa yeelay dabaqado mujtamaca ah oo iska soo horjeeday ama is kadeedahayey ma jirin. Wuxuuse u baaba'ay si dabiici ah, markii heerka qalabka lagu shaqeeyo iyo waxa la soo shaqeeyey labaduba kor u kaceen oo dhagaxiina qalabka ka fiican (Pronzo) lagu beddeley wixii la soo saarahayeyna intii ku filleyd hoyaadka qofka ka bateen. Amaba binu-aadmigu bilaabay inuu xoolo dhaqdo, dhulkana fasho.

## HABKII IS-ADDOONSIGA AHAA :

Habka kani wuxuu ku dhisnaa in qalabka wax lagu soo saaro ama lagu shaqeysto uu ahaa mid layska leeyahay oo qofka u gooni noqon jirey, halkaas waxaa ka bilaabantay «LIHI» dadka qaar leeyahay oo hantay qalabkii wax lagu tacbayey iyo xataa qofkii wax tacbayey oo noqday addoon asna la leeyahay. Heerka dhaqaalaha aadamigu halkaas ayuu weli joogey, qofka wax addoonsadana uma suuro geli jirin addoonka inuu siiyo wax ka badan hoyaadkiisa kamana duwaneyn addoonku qalabka kale oo lagu shaqeysto, ee cadaadin iyo kallifaad foolxun ayaa lagu hayn jirey, haba yaraatee wax xaq ah oo loo oggolaana ma jirin. Mar allaale markii wada noolaantii iyo wada shaqeyntii isbahaysiga ku dhisnaa lagu beddeley addoonsi, iyo cadaadin naxariis la'aan ah, waxaa dhashay kadeedid dadka aadmiga ah qaarna wax kadeedo oo cadaadiyo qaarna la kadeedo. Markaasaa waxaa



loo kala baxay laba dabaqadood oo ah dabaqadii addoonta ahayd iyo dabaqadii addonsatada ahayd. Cadaadintii lagu hayey addoonta waxay ku jaribtay in ay ka dhiidhiyaan oo ka diriraan, taasina waxay sabab u noqotay, in ninkii wax addoonsan jirey uu sameysto dawlad, wax la yiraahdo, oo iska leh sharciyo, askar, boolis, xabsiyo iwm. Taana waxaa loogu baahday si ama marka horeba inta la duulo qolo loo soo dhaco oo addoon looga dhigto dadkeeda, ama kuwii addoonta ahaa loogu hayo addoonnimada laguna khasbo in ay shaqeeyaan. Waxaa casrigaas kor u kacay heerka tacabka ama wax soo saarka binu aadmiga, waxaa isbeddeley qalabkii uu wax ku soo saarahayey kuwaas oo heerkay markii hore joogeen, mid ka sarreeya gaarey, si fiicanna loogu soo jeestay beerafalashada, iyo xoola-dhaqashada. Waxaa bilaabmay hab ganacsi oo wax la kala iibsado, hadal iyo dhammaantii markii aadamigu horukac gaarey oo habka addoonsigu uu gaarsiiyey horukacaas, waxaa lagama maarmaan noqotay in isbeddel kacaannimo ahi yimaado oo habkii oo dhan la beddelo ku kalena dhasho.

## HABKII DHULGOOSIGA :

Habka kani wuxuu ku dhisnaa lihida, qofka u khaaska ah, oo asagu uu iska leeyahay gobol dhul ah, oo looga shaqeeyo. Dhulgoostuhu wuxuu ku shaqeysan jirey dadka beeraleyda ah oo deggan carradaas asagu ku magacaaban yahay, oo beerihiisu ku yaallaan. Ha yeeshee addoon uma ahayn qofka beerta tacbaahi. Qofkaas, inkastoo ay khasab ku ahayd in uu ka shaqeeyo dhulka ninka dhulgoostaha ah iska leeyahay misna, waxaa u suuro geli jirtey, in waxa ay tacbaan, ayana wax hantiya kala hari kareen, oo laftigoodu hantida haba yaraatee wax ku lahaan jireen.

Calaaqaadka iyo isku xirraanta iaadkaas ihi waxay suuro gelisay in wixii la soo saarahayey aad u kordhaan. Mar haddii qofkii wax tacbahayey laftiisu wax ku yeeshay

tacabkii waxaa abuurantay inuu dan ku yeesho badinta waxa la tacbahayo. Horukac guud oo xagga beeraha iyo xagga farsamada gacanta laga qabto, intaba ayaa la gaaray. Taasina waxay suuro gelisay in ay abuurmaan magaalooyin waaweyn. Xagga kale haddaan ka eegno iska horjeedkii ku jirey dabaqadaha mujtamacu ma dhammaan ee waa uun isbeddeley oo waxaa dadkii u kala baxay laba dabaqadood oo kuwii hore ka duwan, oo miduna tahay dhulgoosad, tan kalena dhul tacbe lagu fasho beeraha (inkastoo uusan addoon ahayn).

Kadeedkii iyo isku dulnoolaantii inkastoo ay dhaantay tii habkii hore, misna dhuxeedii waxba iskama beddelin Dagaal kharaar ayaa had iyo goor dhexmari jirey dabaqada dhulgoosadka ah iyo tan dhultacbaha ah. Dagaalladaas oo muddo badan qaarkood socon jirey waxaa ka mid ahaa kuwii ka dhaceen dalalka Ingiriiska, Faransiiska, Jarmalka iyo kuwa kaleba. Horukicii guud ahaaneed oo aadmigu gaarey iyo dagaalkii isdaba joogga ahaa ee dabaqadaha iska soo horjeedaahi ay dagaallamahayeen, wuxuu ku dhammaaday isbeddel kacaannimo oo ku dhaca habkii dhulgoosiga ahaa. Waxaa dhashay hab kale oo kii hore ka sarreeya lana yiraahdo «**Hantigoosad**».

## HABKA HANTIGOOSADKA :

Habka kani si weyn ayuu maanta adduunka uga taagan yahay, waxaa lagu yaqaanaa heer sare oo wax soo saar ah, tacabka binu aadmiga oo batay haddii loo eego hababkii ka horeeyey. Waxaa bilowgii habka kan, dhashay haddana taabba galay Warshadaha, Beeraha, Sancada cusub iyo cilmiga oo heer sare gaaray, wax badan oo dadka ka daahnaana u furay. Mushtarka iyo isweydaarsiga badeecaduna heer sare oo dunida oo dhan ka dhexeeya ayuu gaaray. Hayeeshee markii laga eego dabaqadaha binu aadmiga adduunku waxay dulahaan u kala baxeen, si caddaan ah laba dabaqadood Maalqabeen iyo Shaqaale».



Maalqabeenku waa dabaqada iska leh wixii qalab wax lagu soo saaro,ama lagu tacbo oo dhan, shaqaaluhuna waa ciidan xoogsato ah, oo muruqooda kaga shaqeysta maalqabeenka Warshadihiisa, dukaamadiisa, baabuurtiisa, dayuuradihiisa, maraakiibtiisa, beerihiisa iwm. Hadal iyo dhammaantii waxaa loo kala baxay dabaqad yar oo loo shaqeeyo iyo dabaqad badan oon wax xoogooda weydaarsan lahayn, oo uu ku shaqeysto maalqabeenku. Markis iyo Engels mar ay tilmaamahayeen ninka maalqabeenka ah waxey ku tilmaameen «maalqabeenku waxay sharaftii qofka ku beddeleen qiimaha wax waliba joogaan, xoriyadihii la lahaan jirey oo laysu oggolaa mid keliya ayey ka oggolaadeen, taas oo ah qof waliba in uu xor u yahay tijaarada iyo ganacsiga iyo is dulaalidda aan arxanka lahayn. Hadal iyo dhammaantii waxay ku beddeleen kadeedkii iyo isku dulnoolaantii lagu qarin jiray caqiidada diiniga ah iyo siyaasadda; kadeed cad oo qayaxan aan isu gabbad iyo naxariis iyo xishood midna lahayn. Maalqabeenku waxay haybaddii ay lahaan jireen iyo xushmadii ka qaadeen hawlihii sharafta lahaa oo waxay ka dhigeen dhaqtarkii, garyaqaankii, wadaadkii, gabayaagii iyo caalimkii intaba, dad mushaari ah oo ayaga u qoran. Maalqabeenku wuxuu ka dhigay xiriirkii qoyska ka dhexeeyey oo ku dhisnaa jacaylka, mid isu beddeley dan cad oo ku fadhida lacag».

Habka hantigoosadka ahi markii uu taabbagal noqday oo adduunka ku faafay ayuu jaad imberiyaaliya la yiraahdo isu beddeley. Wuxuu lacag iyo isweydaarsi ganacsi ku saaqay oo ku xeeray adduunka oo dhan ,asagoo ka tallaabay xuduudihii dalka iyo qaaradda, isuna geeyey oo isku xiray dalalka adduunka oo dhan. Isku xirkaas wuxuu ku bilawday markii hore ganacsi, waddammada horey u maray maalqabeenkoodu uu la yeeshay dalalka Afrika, Aasiya, iyo Ameerikada, markii ku xigteyna maalqabeenka Yurub waa ku hansan waayeen xiriirkii jaadkaas ahaa oo wuxuu ku dhaqaaqay in uu xoog ku qabsado adduunka, gumeysi wax la yiraahana ku dhaqo dalalka ku yaal qaaradaha aan soo sheegnay.

Sababta gumeysigaas keentay sidii aan u soo sheegnay waxay ahayd danta maalqabeenka, dantaas oo xagga mushtarka markii laga eego iyo ribix doonka, ahayd in wixii maalqabeenka Yurub soo saarahayey oo Warshadaha Iglan, Faransiiska iyo Jarmalka laga soo saarahayey, loogu baahday suuqyo ay ku iibsamaan iyo dal marka hore laga keeno waxa lagaga shaqeeyo Warshadaha laftigooda sida suufka, dhuxusha, macdanti iwm. Habka hantigoosadka ahi markaas wuxuu ka tallaabay dalalkii uu ka taabba galay ee Yurub oo wuxuu ku faafay dunida oo idil. Asagoo dul ahaan baadiyihii beeraha lahaa hoos keenay magaalooyinka. Magaalooyinkii yar yaraana ku xiray kuwii waaweynaa oo shirkadaha monopoliyada ku haysta ganacsigu fadhiyeen. Wuxuu Yurub ku xiray dunida inteedii kale, amaba waxaa la oran karaa in uu reer galbeedka ka sareysiiyey ummadaha bari. Hase yeeshee habka hantigoosadka ahi wuxuu binu-aadmiga u kala miiray maalqabeen ay had iyo jeer sii kordheyso lihidiisii, iyo shaqaale wax tacba oo dan yarnimadiisu, dhanka kale kasii badanayso, siina xantiirahaya maalinba maalinta ka dambeysa. Habka hantigoosadka ah waxaa lagu yaqaan calaamooyin dhawr an oo ay ka mid yihiin:

1. Isku dul noolansho iyo kadeed qof kadeedo qofka kale.

2. Tartan aan arxan lahayn oo ganacsi oo suuqa loo tartamo ayadoo aysan jirin qorsheyn dhexe ee guud ahaaneed ee nin walbaa waxa uu soo saaro sida ugu ribixa badan uu u qorsheysto, sidaas oo ahaan karta mid aan maslaxadda guud oo dadweynuhu ku jirin.

3. Barwaaqada la tacbo iyo waxa lagu dhaliyo barwaaqadaas oo qalab ah, oon loo sineyn, ee dabaqad yarina hantida wax soo saarta ay leedahay, dadweynaha shaqeeyaana ka qatan yahay faa'iidada shaqada inteeda badan, iyo manaafacaadkaba.



4. Kala sarreyn dadku u kala baxo dabaqado iska soo horjeedo oo kala sarreeya, is cadaadin weynina ka dhaxeeyso.

5. Gumeysi lagula kaco binu-aadmiga qaarkii iyo midab takoor dadka qaarkii lagu fogeeyo midabka jirkiisa.

6. Dagaal la abaabulo iyo fidno hurin joogto ah oo dunida qalalaase ku abuurta.

7. Caddaalad xumo guud ahaaneed oon loo siineyn sharciga hortiisa, caafimaadka, nasashada, shaqada, tacliinta, iwm.

## IMBERIYAALIYADDA (Imperialism)

Habka hantigoosadku wuxuu isu beddeley jaad imberiyaaliyad la yiraahdo muddo ka dib, markuu ku faafay dunida. Taas oo macnaheedu yahay in maalkii iyo awooddii dhaqaaluhu ay ku arruurtay gacmo kooban iyo shirkado caalanka oo dhan saaqay, tiradooduna yartahay. Shirkadahaasi waxay ka soo bexeen dalalka hantigoosigu ka dhashay, ayagoo ku abuurmay isutag dani keentay oo shirkado yar yar kuwo meel dhexaad ah iyo kuwo waaweyn intuba isku biireen. Sidii mid walba tartan aan naxariis lahayn inta loogu qaado, markay suuqa iyo alaabta heliddeeda ciriiri ka gashaba ugu biireysey tiirka weyn, ayaa waxaa soo baxay shirkado waaweyn oo lacag iyo awood dhaqaale oon horey loo arag loona maqlin leh. Boqollaal kun oo dad ahna ku shaqeysta, adduunka oo idilna ku faafsan. Mujtamicii dunida hantigoosadka ah joogey wuxuu noqday intiisa badani, wax shaqaale u ah shirkadahaasi, iyo wax ku nool waxa ay soo saaraan.

Adduunweynuhu wuxuu noqday suuq ballaaran oo barna waxay soo saaraan ku iibiyaan, barna lagala soo baxo waxa Warshadahoodu ku shaqeeyaan ama macdan ha noqoto

ama miro beeraha ka baxa intaba. Waxaa markaas timid in kol haddii badeecaddii ayagu shirkadahaasi sidaas u maamulaan ay marka tartan la'aan ama (Monopolio) ku qabsadeen iibkii iyo soo saariddii intaba.

Dabadeedna hadba qaymaha ugu ribixa badan ay kaga iibiyaan dadweynaha danyarta ah oo adduunka. Waxaa masal ahaan la wada ogsoon yahay inay marka soo baxday in la xaddido sicirka waxa ama la cuno ama la qaato, ama lagu shaqeysto oo qalab ah ee adduunka laga soo saaro, suuqaas waxaa kontroola shirkadahaas waaweyn oo hantigoosadka ah oo ayagu maamula lacagta adduunka inta badanna bunuugtaba iska leh. Waxay marka taasi u suuro gelisay, maalqabeenka adduunka hantigoosadka ah ku nooli in uu kontrool ku hayo kana taliyo waxyaalaha halbowlaha u ah nolosha iyo horukaca dadweynaha ku nool dalalka hantigoosadka ah. Waxyaabahaas ay masal ahaan ka mid yihiin, Bansiinka, Gaaska, Dhuxusha, Milixa, Macdanta, Cuntada, Suufka iwm.

Habka sidaas isugu xiran oo maanta kadeedka weyn iyo dhiigmiirashada ku haya dadweynaha shaqeysatada ah oo adduunka waxaa weeye habkii hantigoosadka oo soo gaaray samaan kaan heer sare oo la yiraahdo «IMBERIYAALIYO».

## HANTIWADAAGGA CILMIGA KU DHISAN

Hababkii aan ka soo faalloonay habka ugu sareeyaa waa kan loo yaqaan hantiwadaagga cilmiga ku dhisan.

Habka kani waa kan ugu sarreeya ee mujtamac lagu dhaqi karo gaarsiinna kara bulshadaas horukac dhaqsa leh ee ka yimaada xag dhaqaale, xag siyaaso, iyo xag bulsho intaba. Habka hantiwadaagga ahi wuxuu u kala-baxaa laba heer oo kala sarreeya. Labadaas heer mid waliba halhays astaan u ah oo lagu yaqaan ayuu leeyahay. Heerka hore waxaa lagu yaqaan in qof waliba waxii uu karaanki shaqaysto leeyahay.



Heerka sare ee labadna in qof waliba wuxuu qaban karo oo shaqo ah, qabto leeyahayna wuxuu u baahdo oo noloshiisa cafimaadkiisa iyo raaxadiisa intaba uga baahdo. Mabda' Hantiwadaagga ahi wuxuu ka koobmaa saddex xubnood oo waaweyn oo kala ah falsafad, siyaaso iyo dhaqaale, saddexdaas xubnood oo midiba tan kale misna ku xiran tahay. Hantiwawadaaggu waa mabda' taariikh dheer soo maray si uu uga dhismo adduunkana, halgan dabaqadeed lagu soo hoyey. Taariikhdiisu waxay hadba heer taagnaataba waxaa, salka cilmiga u qotomiyey abwaanadii K. Marks F. Engles iyo V. Lenin, iyagoo asaas ka dhigtay heerkii aaqoonta binu-aadmigu gaartey xagga falsafada, siyaasadda iyo dhaqaalahaba. Saddexda tiir oo hantiwadaaggu ku qotomo waxay ka soo unkameen falsafadii Jarmalka, dhaqaalihii Ingriiska iyo Cilmigii bulshada ee Fransiiska . Abwaannadii waxay si cilmi ah u faaqideen dhaqaalaha, dhaqanka, siyaasadda iyo falsafada binuaadmiga laga bilaabo waagii uu bidaa'iga ahaa, ilaa waaga uu gaaro hantiwadaagga heerkiisa sare. Faaleyn cilmiya ugama harin abwaannadu arrimaha binu-aadmiga la xiriira iyo dunidaba ee waxay ku dareen in ay tilmaamaan sidii loo beddeli lahaa nolosha bulshada aadamiga ah, loona gaarsiin lahaa heer sare oo tacab soo saar ah iyo horukac guud.

Habka hantiwadaagga cilmiga ku dhisan waxaa lagu yaqaan tiirar asaas u ah dhaqaalihiisa, siyaasaddiisa iyo falsafadiisa intaba. Haddaan tirarkaas qaarkooda waaweyn wax ka xusno waxay oranayaan:

1. A. Xukunka waa in xoogsatadu la wareegto.
   B. In la baabi'iyo hantida wax lagu tacbo oo gaar ahaaneed (means of production).
2. In la helo qorsheyn guud.
3. Inla tirtiro iskadeedka ama isku dulnoolanta.

Fasir kooban haddii loo yeesho qodobka oranaya waa in la baabi'iyaa ama la waayaa hanti wax lagu tacbo oo gaar ah-

aaneed, waxaa micnihiisu yahay in hantida wax laga tacbo sida Warshadaha Beeraha, Macdanta, Bunuugta iyo wixii la mid ahiba, waa inay noqdaan hanti dadweynuhu leeyahay oon qofna gaar u yeelan karin, uguna tasarufi karin faa'iidadooda. Kol haddii hantida waxa lagu tacbaahi ay ka dhexeyso dadweynaha waxaa iska cad in wixii faa'iid ah ee ka yimaadaana ay yihiin kuwo wax loogu qabanayo dadweynahaas. Xagga kale haddaan ka eegno marka hantida wax lagu tacbo oo dhani ay milkiyadda ummadda noqoto, waxaa bata wax soo saarka tacabka la soo saarayo, waxaana heer sare gaara dhaqaalaha ummadda. Dhaqaale horay u kacayna wuxuu suurto geliyaa in, qof waliba oo bulshada ka mid ahiba helo xaqna u yeesho, meel uu ka shaqeeyo, csubitaallo lagu daaweeyo naftiisa iyo xaaskiisaba, tacliin joogto ah nasasho raaxo leh goortuu u baahdo, hoy qurxoon oo uu dego iyo wixii qalab ah oo lagu dhaqmo ama lagu raaxaysto intaba.

Haddaan soo koobo hantiwadaaggu wuxuu oggol yahay saddex jaad oo hanti ah.

a) Hanti ummaddu wada leedahay kana dhexeysa dadweynaha.

b) Hanti iskaashi ku fadhida. Taas oo xoogsatadu isu geysato xooggeeda xoolaheeda iyo qalabkeeda si ay masal ahaanba beero waaweyn u wada tacbadaan, daaro waaweyn u wada dhistaan, xoolo fara badan u wada dhaqdaan, Kalluun badan u soo wada dabtaan iwm.

Iskaashigu waa mid ay iskood isugu tageen oo isu geysteen xooggooda iyo maalkooda, caddad xoogsato ah, ha ahaadeen shaqaale beeraley ama kalluumeysato intaba. Waxay dabadeed dhigtaan qawaaniin hoggaamisa iskaashigooda dhan walbabana lagu xusay. Kolkaas ayey si Jaallanimo ah oo caafimaad qabta u wada noolaadaan una wada shaqeeyaan. Faa'iidada laga helo waxa la tacbo, sida qaalibka ah waa la qayb-



shaa, markaasaa waxba meel munaasib u ah oo danta qof waliba ku jirto lagu duwaa, qaarkalena waxa qaybsada xoogsatada iskaashatay. Waxaa kale oo ayana bannaan hanti saddexaad oo qofku iskiisa u leeyahay asaan ahayn mid wax lagu tacbo. Hantidaasi waxay ahaan kartaa wax kasta oo nolosha qofku u baahan tahay in ay hesho ama ku raaxeeysato, gaar ahaanna qofku u leeyahay asaan kadeed iyo isku dul noolaan dhalin karin.

## QORSHEYN GUUD :

Qorsheynta guud waa tiirarka hantiwadaagga mid ka mid ah. Mabdau wuxuu qabaa in dhaqaalaha gaar ahaan, iyo guudahaanba nolosha bulshada la qoorsheeyo oo si cilmi ah loo jaangooyo. Qorsheyntuna waxay suura gelisaa in tacabka, xoogga wax tacba iyo hantida wax lagu tacbo intaba laysu miisaamo, oo la sii mala odoroso sannadaha soo socda heerka horukaca guud ahaaneed ee ummaddu gaari doonto.

Ayadoo xubin kasta ee bulshadu taqaan waajibaadka laga rabo in ay fuliso iyo muddada ay ku fulineyso waajibaadkaas. Qorsheynta hantiwadaagga ahi waxay si cilmi ah isugu miisaantaa awoodda dalka iyo himilada la goostay in la hirgeliyo xagga dhaqaalaha, xagga siyaasadda iyo xagga bulshadaba. Iskaashi jaallenimo oo qorsheyntaas ku fadhiya ayaa dhexmara waaxyaha dhaqaalaha dalka, masalan beeraha oo warshaduhu u diyaariyaan qalabka ay u baahan yihiin, iyo samaadka (fertilizers) beeruhuna soo saaraan qutul qalibka ummadda, intii loo qorsheeyey. Waxaa la oran karaa in qorsheynta hantiwadaaggu tahay matoorkii wadey dhaqaalaha iyo nolosha bulshada, muraayaddii muujineysey awoodda iyo himilada iyo miisaankii isu dheelli tirayey dhaqaalaha waaxyihiisa oo idil.

## TIRTIRIDDA ISKU DULNOOLAANTA :

Waxaan soo aragnay in hababkii ka horreeyey hantiwadaaggu ku dhisnaayeen bulsho leh dabaqado iska soo horjeeda oo iskadeed iyo isku dulnoolaan isku haya. Hantiwadaaggu wuxuu baabi'iyaa jaad kasta oo isku dulnoolaansho ah ee qof binu aadmiyihi ku dulnoolaado qof kale. Taasina waxay ku suuro gashaa marka la baabi'iyo hantida wax lagu tacbo oo gaar ahaaneed, ayaa waxaa ayana baaba'a isku dulnoolaantii qofka loo shaqeeyaa ku dulnoolaa qofka u shaqeeya ee xoogsatada ah. Markii hantidu noqoto mid dadweynaha ka dhexeysa iyo mid iskaashata, ayaa sinnaan buuxda la helaa oo qof waliba waxa uu shaqeysto leeyahay.

Qofka shaqaalaha ihi wuxuu karaankiisa leeyahay ayuu qabtaa, qiimaha shaqadiisa ayaana dulun la'aan la siiyaa. Halkaasna waxa ku baaba'aya kadeed iyo isku dulnoolaan oo idil. Waxaana dhasha bulsho siman oo hantiwadaag ah oo iskaashi jaallanimo ka dhexeeyo.

## XUKUNKA XOOGSATADA :

Hantiwadaaggu waa mabda' u daneeya dadweynaha intiisa badan oo dulmanaan jirtey, habka hantigoosadka ah markii lagu sugnaa. Hantiwadaaggana waxaa dhaliya dabaqadaha xoogsatada ka mid ah siiba shaqaalaha oo halganka ku bislaada, waayo aragnimana ku yeesha iyo beeraleyda oo shaqaaluhu kaashado garab iyo gaashaanna ka dhigto. Xukunkana dabaqadahaas ayaa qabta. Markaasey u maamulaan si adag. Kana lib-keenaan dibusocodka iyo kacaandiidka, kuwaas oo cadaadin naxariis la'aan ah xoogsatada xukunka haysaa kula dhaqanto.

Dibusocodka iyo kacaandiidku waxay had iyo goorba isku dayaan in ay kufiyaan kacaanka hantiwadaagga ah. Si ay ula soo noqdaan xukunkoodii iyo kadeedkii ay ku hayeen



xoogsatada. Xoogsataduna cadaadin ayey ku muquuniyaan kacaandiidka, kagana lib keenaan. Markaas ayey qorsheeyaan, oo u helaan awood ay ku hirgeliyaan dhismaha hantiwadaagga cilmiga ku dhisan. Ayagoo hubа in ay saldanadu gacantooda ku sugan tahay.

Xukunka markii ay qabtaan bulshada dabaqadihii ugu badnaa, wuxuu noqdaa mid caddaalad iyo sinnaan buuxda laga helo. Waxaa qofka iyo qoyskaba u suuro gala in ay helaan shaqo, cunto iyo jiif, tacliin, caafimaad, nasasho iyo nabadgelyo intaba loo siman yahay. Bulshada waxaa camima nabadgelyo iyo caddaalad. Xukunku wuxuu noqdaa mid dimuqraadi ah oo talada ay wax ku leeyihiin dadka intiisa badani. Waxaa taladu ka timaadaa kor iyo madaxda xaageeda markaas ayey hoos u degtaa iyo ururrada dadweynaha. Amase ururrada ayaa keena talada markaasey kor u gudbiyaan iyo madaxda. Nidaamkaas waxaa loo yaqaan dimuqraadiga meel marka ah. Waana sida xukunka xoogsatadu ku maamusho taladeeduna kor iyo hoos ugu kala socoto, sidaas oo sinnaanta iyo caddaaladda runta ah ku fadhida.

Anagoo aamminsan in habka hantiwadaagga cilmiga ku dhisani yahay kan keliya ee gaarsiin kara horukac dhaqsa ah oo dhan walba ka yimaada bulshada Soomaaliyeed, kan keliya ee u damaanaqaadi kara ummaddeenna sinnaan, caddaalad iyo barwaaqo, kan keliya ee soo nooleyn kara hiddaha iyo dhaqanka san ee bulshadeenna ayaan guddoonsannay inuu noqdo mabda'ii Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ah ee Soomaaliyeed.

Kacaanku markii uu goostay in uu hantiwadaagga qaato waxaa lagama maarmaan noqotay in loo gogolxaaro dhismaha hantiwadaagga. Marxalad taariikhi ah oon laga maarmi karin weeye tan gogolxaarka ahi oo ay tahay in la soo maro inta aan hantiwadaag taam ah la dhisin. Marxaladdaan waxa lagu sugan yahay geeddi, laga guurayo habkii hore, loona

guurayo habka cusub. Ummad walba oo hantiwadaagga dhiseysana in muddo ah ayey ku qaadataa marxaladaasi. Hadda iyo dan, bal aan faalleyno ayagoo kooan tallaabooyinkii kacaanku qaaday, si loogu gogolxaaro dhismaha hantiwadaagga dalkeenna:

## HORUKACII KACAANKU GAARAY

Waxaa guud ahaan la wada ogsoon yahay in dal haddii Kacaan ka curto, kaas oo ah Hantiwadaag, in ay jiraan waxyaaba lagu yaqaan ama dhabbe uu dalkaasi qaado xagga dhaqaalaha, siyaasadda iyo mujtamacaba oo ka duwan, kana fog kii uu horay ugu socday oo ahaa habka hantigoosadka ama ku ka hooseeya. Soomaaliya marka aan ka hadleyno waxay nala tahay in aan faahfaahinno sida ilaa iyo hadda hantiwadaaggu uga dhaqan galay dalkeenna, si aysan muran iyo shaki midnaba u gelin marxaladdaan ku jirro haatan oo ah «Gogol xaarkii ama gogoldhiggii» Hantiwadaagga.

DHAQAALAHA :

Hantiwadaaggu wuxuu si buuxda ama taam ah uga dhaqan galaa dal marka hantida wax lagu tacbo oo dalkaas taali ay noqoto mid kuligeedba ummaddu leedahay danta guudna loogu shaqeeyo, hantidaas ribixeedana dadweynuhu u siman yahay. (Hantida wax lagu tacbo waxaa ka mid ah warshadaha, beeraha, mushtarka, daaraha iwm.), hayeeshee muddada qoloba heerkaas ku gaartaa waxay ku xiran tahay dhaqaalaheeda, dadkeeda iyo dalkeeda. Inta laga gaarahayo Hantiwadaagga buuxa dhismihiisana waxa waddan waliba maraa jid dheer oo loo yaqaan kii «Geeddiga», jidkaas oo u socda sidii dhinac kastaba looga dhisi lahaa Hantiwadaag taam ah.

Haddaan xogtayada ka warramo, waxaa la wada ogsoon yahay, tallaabooyinkii xagga dhaqaalaha Kacaanku ka



qaaday. Ayadoo loo gogol xaarayo dhismaha hantiwadaagga dalkeenna, kuwaas oo ay ugu waaweynaayeen : Bunuugtii iyo Warshadihii gacanta ajnebi ku jirey oo loo soo wareejiyey lagana dhigay hantida ummadda. Tallaabadaas oo ujeeddooyin waaweyn ee hantiwadaag ahi ka dambeeyeen kuwaas oo ahaa :-

A) Xiriirka gumeysiga dhaqaalaha in dalku ka baxo iyo kadeedka (exploitation) ajnebigu ku hayo xoogsatada Soomaalieeyd.

B) Raasumaalka dalka yaal halkii uu u badnaa ama uu ugu faa'iidada badnaa in la geliyo gacanta ummadda laguna dhiso ribixa ka yimaada raasumalkaas salkii dhaqaalaha dalku ku istaagi lahaa oo ah warshado, beero iwm. maxaa wacay waxaa iska cad in aan meel aan waxba ool, waxba laga dhisi karin. Sideedana hantida salka u noqotaa dhismaha hantiwadaaggu waa tii habkii hantigoosiga ahaa dhulka taalley, laakiin keligii cunaha hantigoostaha ihi ku tasarufi jirey.

T) Qorshayn guud oo dhaqaalaha dalka oo dhan la qorsheeyo in la helo (haddii xoolahaaga intoodii badnayd ay gacan ajnebi ku jiraan ma heli kartid sidaas) sidii lagu aqoon jirey dhismaha hantiwadaagga.

J) Daryeelidda danaha shaqaalaha ku nool meelahaas ayaga ah.

X) Kordhinta tacabka la kordhiyo ayadoo loo danaynayo dadweynaha waxa ka soo geli kara ama waxa uu u baahan yahay. Ulajeeddooyinkaas xeesha dheer ayaa ku daba jiray gacan gelintii Bunuugta, Warshadaha, Baayac-mushtarka iyo waxyaabihii dawladdu ku soo celisay gacanta xoogsatada Soomaaliyeed.

tallaabooyinkaas waxaa ku xigey kuwii laga qaaday xagga beeraha oo ahaa :-

1 : Cunnadii (galleyda, masaggada, saliidda) oo beeriddeedana iskaashatooyin loo nidaamiyey iibkooda iyo qaybintoodana dawladdu gacanta ku qabatay, ayadoo looga dan lahaa in :

A) Dullaalka kadeedka ku hayey beeraleyda, wax soo saarta iyo dadweynaha wax laga iibsho labadaba, in meesha laga saaro oo dadweynaha loo daneeyo.

B) In la badiyo waxa la tacbahayo kol haddii qiime go'an oo faa'iido ugu jirto loo xaddiday ninkii beeraleyda ahaa.

T) In dawladdu gacan ku leedahay kaydinta iyo badinta saraca dalka oo dhan, si hadba waxa dadku cunahayo loo badiyo beeritaankooda.

J) In la abuuro iskaashatooyin beeraley ah oo beera miro ku filan waddanka gudihiisa, dheerigana dibedda loo iib-geeyo.

X) In la asaaso beero dawladdu leedahay oo kordhiya waxa dalka laga tacbo.

KH) In dadweynaha awood lacageed leh iyo dawladduba xoogga saaraan sidii horey loogu marin lahaa beerafalashada dhulkeenna, taas oo ah salkii dhaqaalaha dalka iyo guntii uu ku qotonsan lahaa dhismaha dhaqaalaha hantiwadaagga ahi.

Waxaa kale oo ka mid ahaa tallaabooyinkii cad caddaa oo xagga dhaqaalaha laga qaaday abaabulidda qorshayn tifaftiran oo koobta wax kastaba dhaqaalaha ama nolosha dalka, taas oo ku fadhida qaayaha weyn ama ujeeddada ballaaran ee hantiwadaagga ah oo suuro gelinaysa in qorshayn dhexe dalku leeyahay, wax waliba oo soo kordhahayaana ay waafaqsan yihiin qorshayntaas (shantii sano ama ka yarba mar la sameeyo). Taasi waxay kuu suura gelinaysaa in aad garatid waxa aad haysato, waxa aad rabto iyo waqtiga aad ku rumeyn karto horukacaaga guud ahaaneed.



Xagga beeraha haddaan u laabto waxaa muuqata in maanta beeraleyda Soomaaliyeed ay haystaan tilmaan cad oo ay ku hiran karaan, taas oo ah iskaashi beereed oo inta xoogga iyo xoolahaba laysu geeyo la tacbo waxa dadka Soomaaliyeed u baahan yahay, waxaa markaa laga baxay beeriddii jaadka keliya ah (sida muuska oo kale) kaas oo gumeysigu horay ugu xirxiray, ama ugu dabray beeraheenna. Waxaa batay jaadadkii saraca ahaa oo nacfiga dadweynaha u lahaa, ee beeraleydu ayagoo dawladda la kaashanaya, ay beereysey. Kuwaas qaar ka mid ah sida galleyda, masaggada, waxaa la oran karaa in laga haqab tiray dadweynaha. Waxayna qorshayntu u socotaa in waxa dibedda laga keeno oo dhan oo ka baxa beeraha, aan ku beerro dhulkayaga in ku filan dadkayaga sida saliidda, burka, bariiska iwm.

## XAGGA WARSHADAYNTA :

Ayadoo la ogsoon yahay in aan waddanna dhisme buuxa hantiwadaag dhisi karin hadduusan lahayn sanaacaad ka furata ku-xirnaanta iyo dabajoogga waddammada hantigoosadka ah, oo horay ama u addoonsan jiray ama xiriir aan sinneyn oo dhaqaale ka dhexeeyey, ayaa si waafaqsan taagta iyo tabarta Soomaaliyeed, waxaa loogu dhaqaaqay in la abuuro salkii sancada iyo farsamada dalkeenna. Warshado kala jaad ah oo mid waliba xubin muhim ah ka tahay dhaqaalaha, kuna fadhida waxa beeraha, xoolaha iyo badda, aan ka hello, ayaa la sameeyey. In badanna hadda ayaa faraha lagu hayaa sameyntooda.

Waxaa lagama maarmaan ah in dhaqaalaha salkiisa oo ah beeraha, xoolaha, badda iyo madaxiisa oo ah warshadaha iyo korontadu si miisaaman oo cilmiga hantiwadaagga ku fa-

dhida, isula socdaan. Waxaan is-leennahay xagga qorshaynta guud waa lays waafajiyey arrimahaas, wax qabadkuna wuxuu ku socdaa dhabbihii loo qorsheeyey.

Waxaan oran karaa dhismaha hantiwadaaggu wuxuu ku fadhiyaa dalkeenna gunta dhaqaalaha (beeraha, xoolaha, kalluunka), oo lagu daray madaxa dhaqaalaha oo ah sancada iyo korontada. Halkaas waxaad ka garan kartaa in dhaqaalaheenna lagu masali karo qofka jirkiisa oo kale guntu waxay ku abbaaran tahay oogada inteeda badan sancada iyo korontaduna maskaxdii jirka.

## XAGGA MAALIYADDA :

Kacaankeennu wuxuu aad ugu dadaalay inuu miisaaniyad caafimaad qabta ku maamulo dhaqaalaha dalka oo idil, waa layska garan karaa wax hawl yar in aysan ahayn sidii taas lagu heli lahaa, khusuusan dal gumeystaha iyo abaankiisu dib u dhigeen dhaqaalihiisa, sida kaayaga oo kale kuna noolaa Kacaanka hortii deynba deyn ku gaar, iyo baryootan foolxun. Dalkayaga dawladihii dibusocodka ahaa uguma tala gelin maaliyad horumarinta, mana u soo jeedin taas. Si haba yaraatee lagu helo xoolo lagu dhiso dhaqaalaha oo aan miisaaniyaddu masruuf keliya u noqon, waxaa loo baahday dawlad iyo dadweynaba, in guntiga dhiisha laysaga dhigo, oo dhaldhalaalkii foosha xumaa oon ku fadhiyin dhaqaalaha inta laga baxo, loo huro maalka qaarkii horumarinta dalka. Waxa sharaf u ah dadkeenna iyo dalkeennaba, in inta wixii deyn ahaa ee dawladdu dadweynaha ka qabtey la baxshay, misana keyd ballaaranna la dhigay, oo lagu duway, keydkaas dhismaha beeraha, xoolaha, kalluunka iyo warshadaha. Waxaa iska cad in rag iyo Rabbiba wax la qabtaan qofkii wax qabsanahaya, sidaas awgeed waxaan muddadii na soo gudubtay ku dadaalnay in aan horta tabartayada iyo tacabkayaga wax ku qabsanno, dabadeedna la kaashanno saaxiibka wixii dhinnaada.



Guusha ugu weyn oo Kacaanku ka soo hoyey xagga dhaqaalaha waxaa la oran karaa inay tahay ummaddayada oo la baray inay iskeed wax u qabsato, oo xooggeeda iyo xoolaheeda kaga hortagto dhibaatooyinka ka haysta xagga dhaqaalaha si ay isku fillaan ku gaarto.

Mabda'aasi wuxuu ka mid yahay tiirarka ugu waawevn, dhismaha hantiwadaagga dalkeenna, waxaan muran lahayn in tiirkaas wax qabsadka ah uu si weyn u hanaqaaday. Mashaariic waaweyn oo beeraha, biyaha, bacaadcelinta, dariiqyo dhisidda intaba leh ayaa ummaddu xooggeeda ku dhistay, mid waliba marka uu dhammaado wuxuu laabta u dejinayey, kalsooni weynna ku abuuray dadwyenihii ka qayb galay iyo guud ahaanba dadkeenna. Waxaa kalsoonidaas la socotay aamminaad dadku aammino wax ku oolnimada mabda'aas hantiwadaagga ah iyo sida dhaqsaha leh oo shaqada laysu kaashaday ay wax weyn uga tarto horukaca dadkeenna iyo barwaaqaynta dalkeenna.

Waxa la waayey oo xabaal gashay, liidnaantii qofku is-liidi jiray, ama tababarkii gumeystuhu ummadda ka dhaadhiciyey inaysan la'aantiis iyo cilmigiisa la'aantood wax qabsan karin, in dalku faqiir yahay, dadkeennuna caajis yahay. Beentaas cad oo isticmaarku ku tallaalay maskaxda dadku, waxay noqotay sida dhalanteedka oo kale. Miraha shaqadu dhalisay markuu mabda'a hantiwadaagga ku duulay dadkayagu, ayaa daliil cad oo muran ma doonto ah u noqday waxtarnimada mabda'u leeyahay, iyo sarreynta uu ka sarreeyo habka hantigoosadka. Intaasi waxay ahaayeen, waxyaabihii la oran karay gogoldhigga dhaqaalaha dalkeenna, muddadii Kacaanka hantiwadaagga ahi ka dhisnaa Soomaaliya.

## XAGGA SIYAASADDA :

Gogol-xaarka ama gundhiggaadda loo gogol xaaray habka hantiwadaaggu sidii uu uga dhismi lahaa dalkayaga

xagga siyaasadda haddii la eego, wuxuu bilowday curashadii Kacaankeenna hantiwadaagga ahi ka dhashay dalka.

Waxaa taas u daliil ah qodobbadii Xaashida Kowaad iyo tan Labaad oo Xeerka Kacaanka ahaa ee la soo saaray Kacaanka dhalashadiisii : Tusaale ahaan haddaan u fiirsanno qodobbadaas ujeeddada weyn oo hantiwadaagga ah ee ku iirtay waxaa layska garan karaa dhabbaha uu ku socday Kacaanku bilowgiiba.

Siyaasadda gudaha marka laga eego qodobbada ugu waaweyn Xaashida Kowaad waxay oranaysaa :-

1. In la abuuro mujtamac ku dhisan shaqada caddaaladda ayadoo la tixgelinaayo wadciga iyo nolosha mujtamaca Soomaaliyeed :

2. In la diyaariyo qorshayn dhaqaale ijtimaaci iyo hiddaha iyo dhaqankaba ku fadhida, si lagu gaaro horukac guud, dhaqso leh oo dalka.

3. In la tirtiro aqoondarrida lana gaarsiiyo heer sare hiddaha iyo dhaqanka Soomaaliyeed.

4. In la qoro Afkayaga Hooyo.

5. In la tirtiro jaad kasta oo musuqmaasuq ah, fowdo, qabyaalad iyo nooc kasta oo caada xumi ah ee horay loogu dhaqi jiray shaqada dawladda.

Qodobbadatan siyaasadda gudaha waxaa ka muuqan kara ujeeddada Kacaanka. Qodobka kowaad wuxuu caddeynahayaa inUusan haatan jirin adduunka, horayna u soo marin taariikhda bani-aadamiga, mujtamac ku nool shaqo, sinnaan iyo caddaalad oon kan habka hantiwadaagga qaatay ahayn.



Habkaas oo keliya ayaa laga helaa sinnaan loo siman yahay, shaqada iyo barwaaqada shaqadu dhaliso. caddaalad aan qofna qofka kale kadeedi karin, dawlad caaddil ah oo run ahaanta dimuqraadi ah, taas oo ah in xukunka ay hayaan ummadda inteedii badnayd oo ah shaqaalaha, beeraleyda, reer guuraaga, ciidammada, indheer-garatada Kacaanka ah iyo dul ahaamba intii habkii hantigoosadka la dulmi jirey, ayaa xukun caaddil ah ku maamusha waddanka.

Arrimahaas oo idil iyo in kaloba waxay daliil cad u yihiin caddaaladda mujtamaca hantiwadaagga ah laga helo. Haddaan qodobka labaad ee siyaasadda gudaha faallo yar ka bixinno, waxaa kuu muuqanaysa in qorshaynta dhaqaalaha iyo nolosha inteeda kale la qorsheeyo oo lagu socdo dhabba hore loo qayaxay, lagu yaqaan habka hantiwadaagga ah oo keliya taas, oo loola jeedo in dhaqaalaha dalka iyo xubin kasta oo nolosha mujtamaca ka mid ah laga ilaaliyo fowdada iyo kala firirka aan loo baahnayn, laguna duwo danta guud. Mujtamac hantiwadaag ah oo dhismahaya waxaa lagama maarmaan ah inuu ku jeediyo xoogga dhaqaalihiisa oo dhan meelaha si degdeg ah u barwaaqaynaya dalka, salkana u ah dhaqaalaha dalka, sida beeraha, xoolaha, badda, warshadaha, iwm. Tan ugu weyn ee dhaqaalaha qorshaysani kuu suuro geliya waxay tahay in aad ogaato awoodaada, waxa kaa maqan iyo halka aad u socoto. Qorshayntu waxay ku siisaa tilmaan cad ood ku hirato, masal ahaanba waxaad sii ogaataa heerka aad rabto in aad ka gaarto mustaqbalka tacliinta, caafimaadka, dhismaha guud iyo dhaqaala weynaha intaba.

Taas oo qof waliba, ama koox waliba ay og tahay waxay qabanayso iyo heerka laga filayo inay gaarto oo si joogto ah, loogula xisaabtamayo Waxaa baaba'a tartankii xad-dhaafka ahaa oon ku fadhin jirin danta dadweynaha iyo baahida guud ee dalka, oo habka hantigoosadku ku caan baxay, kaas oo dhaqaale aan dheelli tirnayn keena. Dhaqaalaha hantigoosadka waxaa lagu yaqaan in maalqabeenku xoolihiisa geliyo

hadba meesha ugu ribixa badan, taas oo ay suurtowdo in ayan nacfi badan u lahayn dadweynaha.

Masal ahaan waxaa dhacda in malaayiin lacag ah lagu khasiro alaabada lagu raaxeysto ama wax la daawado oon macna weyni ku jirin, ayadoo ummadda maalqabeenkaasi ka dhashay qaarkeed laga vaabo inuu gaajo u dhimanahayo, in fara badan oon shaqo haysanina ay joogto. Waxaa taas ka sii foolxun oo lagu yaqaan dhaqaalaha aan qorshaha dhexe lahayn ee hantigoosadka ah, inuu maal aan la koobi karin ku sameeyo hub qumbulado iyo saanado lagu laayo bini-aadmiga, si xaqdarro ahna loogu cadaadiyo ummado u dirirahaya xornimadooda. Mar haddey ribix u leedahay maalqabeenka dalalka imberiyaaliistaha ah ioogo, geeri ama dilkuba waa u barwaaqo. In doontoo malaayiin dad aan dembi gelin ah ku le'daan, waxba uguma jiraan arxan iyo danna kama galo imberiyaaliistuhu haddii ribix ka soo gelayo. Intaas oo dhan waxaa sabab u ah, dhaqaale qorshaysan oo lagu fariisiyey loona maamulo si waafaqsan danta dadweynaha ayaan jirin, kamana dhalan karo waddan hantigoosad ah.

Qorshayntii haddaan intaas uga baxno, waxaa kale oo ayana ku soo aroortay qodobka saddexaad ee Xaashida Koowaad, in la tirtiro aqoondarrida lana gaarsiiyo heer sare hiddaha iyo dhaqanka Soomaaliyeed.

Saddex cudur oo waaweyn ayaa bini-aadmiga haysta weligood, kuwaas oo ah jahliga, cudurka iyo gaajada. Hantiwadaaggu waa habka keliya oo ka saari kara ummadda saddexdaa cudur, hase yeeshee, saddexda laba ka mid ah oo ah cudurka iyo gaajada waxaa dhala jahliga. Aqoonta bini-aadmiga inta ay hadba gaarto ayaa wax qabsigiisu leegyahay, hadba sida uu wax u qabsado ayey ku xiran tahay isku fillaantiisa iyo barwaaqaynta dalkiisu. Ummadaha adduunka waxaa kala sara mariyey dhankii loo eegaba, waa heerka aqoonta ee mid waliba gaartay.



Intaas haddaan caddeynay, waxaan muran ku jirin in waddankayaga dhismihiisa iyo kicinta dadkiisa midnaba uusan suuro geli kareen haddaan marka hore aqoonta dadkiisa kor loo qaadin. Sidaas awgeed waxaa waajibka ugu horreeya ee Kacaanka hantiwadaagga Soomaaliyeed noqday, la dagaallanka aqoondarrida iyo abuuridda dhaqanka san ee dadka. Hantiwadaagga aan qaadannay wuxuu ku fadhiyaa cilmi, cilmigaasna waxaa ku dhaqmi kara qof aqoon u leh dadkiisa, dalkiisa, caadooyinkiisa, xeerkiisa iyo dul ahaanba wadciga dalkiisa yaalla.

Himiladeenna tan ugu weyni waxay ahayd aqoonta faafinteeda, waxaa la wada ogsoon yahay in gumeysigu dib u dhigay horukaca dalkeenna muddo sannado badan ah. Taasi waxay ugu suurtowday aqoondarrida iyo jahliga dadweynaha lagu hayey. Waxaan shaki lahayn in aan marnaba gumeysi kor joogi karin ummad wacyi leh oo garanaysa aayatiinkeeda. Wacyigana sida la wada ogsoonyahay waxa abuura waa aqoonta. Hiddaha iyo dhaqanka dadku, waxay tilmaan u yihiin heerka horukaca ah iyo bislaanta dadkaasi gaaray, waxay kaloo si cad u muujiyaan taariikhda isdabajoogga ah oo ummaddu hadba heerka ay joogtay, waxaa laga helaa murtida ummaddaas dhankii loo eegaba. Ayadoo taas maanka lagu hayo ayaa ujeeddooyinka hantiwadaagga ah ee Kacaankeenna waxaa kaalin weyn laga siiyey soo nooleynta iyo daryeelidda hiddaha iyo dhaqanka ee saldhigga u ah jiritaanka ummadda Soomaaliyeed.

Ayadoo aan aamminsan nahay in saqaafada ama aqoonta cusub ee Kacaanka hantiwadaagga ahi dhisayaa ay sal ka dhigan doonto hiddihii, dhaqankii iyo aqoontii murtida iyo xigmada miiran lahayd ee Soomaalidu ka Ab-ka-Ab kala dhaxashay, ayaa waxaan waajib isaga yeelay in habaaska laga jafo oo la nuuriyo wixii hidde iyo dhaqan ama caado san oo horusocod ahaa ee ummaddu lahayd. Sida gabayada, heesaha, geeraarada, cayaaraha, farsamada, hiddaha la xiriira iwm.

Aqoonta guud ahaanteeda iyo hiddaha gooni ahaanba, midna kama dhismi karo meel aan horay waxba u jirin. Waxaa habboon ama ujeeddada habka hantiwadaagga ahi tahay in wixii samaa oo horusocod leh ee ku jiray habkii hore, oo aqoon cilmiya ah, ama hidde iyo dhaqan iyo caadooyin intaba leh, in la soo nooleeyo korna loo qaado gundhigna looga dhigo dhismaha saqaafada hantiwadaagga ah. Waddankayaga uma suuroobi karin in la tirtiro aqoondarrida, mana suurtowdeen in la soo nooleeyo heer sarena la gaarsiiyo hiddaha iyo dhaqanka, haddaan marka hore la qorin Far Soomaaliga. Sida aysan suurogal u noqoteen in jahliga iyo aqoondarrida laga baabi'iyo dalkeenna, marka hore haddaan la qorin afkayaga hooyo, dabadeedna la hirgelin barashadiisa.

Baahida loo qabo qoridda Afka oo dhankii loo eegaba lagama maarmaan u ahayd nolosha dadka Soomaaliyeed oo dhisanahaya hantiwadaagga, ayaa waxay sabab u ahayd in qodobbada ugu muhimsan Xaashida Koowaad ee Kacaanka lagu xuso, laguna caddeeyo in Af Soomaaliga la qori doono markii Kacaanku curtayba. Haba yaraatee layskuma ladin qabanqaabinta shaqadii loogu gun-xaaraycy farta qoriddeeda. Natiijadii ka soo baxday, shaqadaas waxay ahayd go'aankii Golayaasha oo ku saabsanaa farta qoriddeeda. Waxaa la oran karaa in afka qoriddiisu sabab u noqotay Kacaan aqooneed ee ku faafay dadka Soomaaliyeed meel kastaba ha joogee Kalsoonida ummaddu muujisay, dadaalka uu la yimid dadweynuhu iyo dhaqsaha ay durba ku hirgashay barashada fartu, magaalooyika iyo miyigaba waxay noqotay arrin argagax iyo la yaab gelisay cadowga Kacaanka, gudaha iyo dibeddaba, farxad, guul iyo kalsoonina ku abuurtay niyadda dadkeenna Kacaanka ah sama jeclaha iyo saaxiibka Soomaaliyeedba. Shaki waxaan lahayn in muddo aan dheereyn dabadeed barashada Afka Hooyo, oo wadata faafinta aqoonta iyo cilmigu ay ku faafi doonto balad iyo baadiyaba dalkeenna. Lana waayi doono qof Soomaali ah oon wax qorid iyo akhris aqoon dalka gudihiisa.



## MAAMULKA DAWLADDA :

Habka hantigoosadku cudurro badan ayuu iskiisaba dhalaa. Dalkayaga Kacaanka hortiis dibusocodkii xukunka hayey iyo isticmaarku, waxay gaarsiiyeen heer foolxun, maamulka dawladda iyo habka shaqadu u socoto intaba. Musuqmaasuq, caddaalad xumo, fowdo, qabyaalad iyo eexi, waxaa weeye kuwii ugu waaweynaa cudurradii habkii hantigoosadka ahaa iyo isticmaarka iyo abwaannadiisu ku tallaaleen maamulka dawladda.

Sidaas darteed waxaa lagama maarmaan noqotay in xididdada loo siibo arrimahaas foosha xun, oo Kacaanku qodobbadii uu caddeeyey midkood lagu xuso arrintaas ayada ah. Dagaal cad ayaa lagu qaaday cudurradaas si looga tirtiro mujtamaca Soomaaliyeed guud ahaantiisba, amase gaar ahaaneedba si looga baabi'iyo maamulka dawladda.

Kacaan hantiwadaag ah uma suuroobi karto inuu ku shaqaysto maamulkii dawladda oo hore u taagnaa ayna ka buuxeen cudurrada aan tilmaannay oo idil. Sidaas awgeed si weyn ayaa loogu dadaalay sidii loo beddeli lahaa maamulkii hore oo dawladda, ku la socda mabaadi'da hantiwadaagga ahna looga dhisi lahaa.

Dagaalku ma yarayn wax maalin iyo sano intaaba ku dhammaan karana waa ka weynaa. Waxaase yididdiilo leh in musuqmaasuqii, eexdii iyo qabyaaladdii dagaalkii lagu qaaday intoodabana guulo badan laga gaaray. Dul ahaan waxaa looga bogsoon karaa cudurradaas habkii hore ka tegey, ayadoo la carrageddiyo xididdadana loo siibo habkii hore iyo inta u hanqal taageysa musuqmaasuqii la aasay. Taasina waxay ku suuro geli kartaa dhiig cusub oo kacaan ah, hantiwadaaggana aamminsan oo hantiya maamulka dawladda. Qodobbada ugu dambeeya Xaashida Koowaad ee Kacaanka midkood wuxuu oranayaa waa in la baabi'iyo axsaabtii hore u taagnayd oo idil, lana sameeyo doorasho guud waqtiga ay munaasib noqoto.

Kacaankeenna hantiwadaagga ahi wuxuu, min maalintii uu dhashay xooggiisa saaray kicinta iyo baraarujinta dadweynaha xoogsatada ah oo Soomaaliyeed iyo soo nooleynta qiirada waddaninimada ah. Taas waxaa looga dan lahaa in niyaddii dhimatay, qiiradii habaasku fuulay iyo Soomaalinimadii duugantay la soo nooleeyo. Heer u dhigmi kara kana sarreeya kii dadku gaaray, waagii xorriyadda loo dagaallamayey in la gaarsiiyo ummaddeenna. Maxaa wacay, bislaan siyaasi ah ayaa sal u noqon karta wax qabsi iyo horukac oo dhan.

Ma yarayn dhibaatada laga soo maray shaqadaas weyn oo baraarujinta ah. Hase yeeshee, waxaa maanta nin kastaaba qirayaa in heerka waacinimada ah, oo dadkayagu gaaray uu yahay mid lagu faani karo. Waxaa markaas bannaan ujeeddadii hantiwadaagga ahayd ayada oo ku qotonta in, laga hadlo doorasho iyo xisbi abaabuliddii. Sidaas awgeed waa tii lagu dhawaaqay sannadguuradii afaraad in xisbi siyaasi ah dalka laga sameyn doono, asagoo ku imaan doona doorasho iyo xulid, dadka Kacaanka ah oo hantiwadaagga aamminsan laga dhex sameeye, kadib markii Kacaanka Oktoobar dalka ka sameeyey isbeddel qota dheer xag dhaqaale, tacliin, siyaasad iyo bulshaba oo uu xil gaar ah iska saaray kicinta bulshada iyo abuurista kaadar horseed u noqda dhismaha Kacaanka Hantiwadaagga ah. Iyo ayadoo muddadii iixda sano iyo dheeraadka ahayd ee Kacaanku hoggaaminayey dalka ay muuqato in Ummadda Soomaaliyeed u soo noqotay midnimadeedii, gobannimadeedii iyo kalsoonideedii, dadweynaha Soomaaliyeedna gaarey biisayl siyaasi ah oo uu ku garan karo dantiisa iyo dariiqa uu u marayo.

Waxyaabahaas oo idil ayaa nagu dhiirri geliyey in aannu furno ayadoo ah waqti munaasib ah 1dii Luulyo 1976, Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed, oofinana ballan qaadkii ku xusnaa Warqadii Kowaad ee Kacaanka. Markii aan soo koobno waxay nala tahay in ujeeddooyinkii xeesha dheeraa ee mala odorosahayey si cilmiya, habka aan qaadannay oo hantiwadaagga cilmiga ku dhisan ah, ay rumoobeen oo xaqiiq jirta maanta dalkeenna yihiin.



Intaasi waxay ahayd qodobbadii ugu muhimsanaa siyaasadda gudaha ee Kacaanka. Annagoo ogsoon in siyaasadda guduhu had iyo jeerba wadato siyaaso dibadeed oo ah muraayaddii waxa dalka gudihiisa ka socda, bal aan faallo gaaban ka bixinno qodobbada ugu waaweyn siyaasadda dibedda ee Kacaanka, kuwaas oo lagu caddeeyey Xaashida Koowaad.

## SIYAASADDA DIBEDDA EE KACAANKA :

Waxa la wada ogsoon yahay in siyaasadda dibedda oo dawlad walbaaba ay salka ku heyso muujisana hadba nidaamka siyaasiga ah oo dawladdaasi doortay in ay ku dhaqanto gudaheeda.

Mawqifka ay dawlad waliba ka istaagto arrimaha ka taagan adduunweynaha iyo kaalinta ay ka qaadato arrimahaas ayaa lagu tilmaansan karaa heerka horusocodnimada ama dibusocodnimada ah, oo ay ku sugan tahay dawladdaasi. Waddan walba dhismihiisa siyaasiga ah ee gudaha, xagga dhaqaalaha xagga mujtamaca iyo xagga siyaasaddaba heerka uu gaaray ama dhabbaha uu ku socdo, kaas oo ah habka uu waddankaasi ku dhaqmo ayaa siyaasaddiisa dibeddu adduunka u iftiimisaa.

Axdiga Kacaanka xaashida koowaad waxa ku soo arooray qodobbada ku saabsan siyaasadda dibedda ee Kacaankayaga Hantiwadaagga ah. Sida ka muuqata qodobbada axdiga, waxaa la soo bandhigay goortii Kacaanku curtayba siyaasadda dibedda, oo ka soo horjeedda imberiyaaliyadda, gumeysiga iyo isku-dul-noolaanta diiddanna midabtakoorka iyo sahyuuniyadda, una horseedaysa madaxbannaanida ummadaha la gumeysto iyo in ummadaha adduunku ku wada dhaqmaan sinnaan, caddaalad, istaageerid iyo nabad waarta.

Haddaan faallo kolka ka bixinno qodobbada ku soo arooray axdiga Kacaanka siyaasaddiisa dibedda waxay oranayaan :-

1. Waa in la adkeeyaa istaageeridda ka dhaxeysa ummadaha adduunweynaha siibana waa in la taageeraa dhaqdhaqaaqyada gobannimadoonka ah ee adduunka.

2. Waa in lala diriraa jaad kasta oo gumeysi ama gumeysiga cusub ah.

3. Waa in la mideeyaa Qaranka Soomaaliyeed.

4. Waa in la aqoonsadaa mabda'a ku dhisan wada noolaan nabadeed oo ka dhexeysa ummadaha adduunka oo idil.

5. Waa in lagu socdaa siyaasadda dhex dhexaadka waxtarka ah.

6. Waa in la aqoonsadaa lana dhawraa wixii mucaahado ah ay horay ula gashay dawladaha adduunka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed.

Kuwaasi waxaa weeye lixda qodob oo ay ka kooban tahay siyaasadda dibedda ee Kacaanku.

Waxaa nala habboon in aan faallo kooban ka bixinno qodobbadaas ayaga ah si loo fahmo ujeeddada toosan oo ay ku dhisan yihiin qodobbadaasi. Haddaan soo qaadanno qodobka koowaad waxaa si cad kuugu muuqanaya, in aan dawladi taageeri karin dhaqdhaqaaqyada gobannimadoonka ah ee adduunka haddii, aan nidaamka ay qaadatay ahayn mid ka dhan ah is gumeysiga, is kadeedka iyo isku dulnoolaanshaha. Waxaa dagaal joogto ah oo mabda'a ku dhisan, lagu qaadi karaa is addoonsiga iyo isku dulnoolaanshada iyo kadeedka, marka la aamminsan yahay in bani aadamigu ab uu yahayba mudan yahay, in uu ku noolaado sinnaan iyo caddaalad, loono oggolaado in ummad waliba ka taliso aayatiinkeeda.



Ayadoo la ogsoon yahay in mabda'a diiddan isku dulnoolaanshuhu yahay kan hantiwadaagga ah, maankana lagu hayey in uu noqdo Falsafada Kacaanka 21kii Oktoobar dhalashadiisiiba, ayaa sidaan soo sheegnay la guddoonsaday in taageero buuxda oo af iyo addinba ah loo fidiyo dhaqdhaqaaqyada gobannimadoonka ah ee adduunka, guud ahaantii, gaar ahaanna qaaradda aan ku nool nahay ee Afrika. Waxaa marag ma doonto ah, in muddadii Kacaanka dhalashadiisa ka dambeysey aan layskula hadlin sidii wax loola qaban lahaa ururrada gobannimadoonka ah ee Afrika iyo Aasiya. Waxaa Soomaaliya iyo Afrika inteeda kaleba nasiib wanaag iyo sharaf ay soo hoyeenba u ah in waddammadii gobannimadooda u halgamayey ee Afrika intoodii badnayd ay maanta xoroobeen inta kalena rajo weyn laga qabo in ay dhacsadaan xornimadooda. Sidaas oo kale waxaa meel weyn nagaga yaalla, qiime weynna nala leh dagaalka ummadda aynu walaalka nahay oo reer Falastiin, ay kula jirto Sahyuuniyadda adduunka iyo imberiyaaliismada.

Wxaaa is ka cad in dalka Falastiin ka maqani uu yahay mid ka maqan Soomaaliya oo kale, maxaa wacay Falastiin waa walaalkayo Carbeed, dal Carbeed oo maqanina waa dalkaayo ah oo maqan. Waxaa la mid ah dhulkii Yuhuuddu ka qabsatay waddammada Masar, Suuriya iyo Urdun. Kacaankeennu wuxuu qabaa in lagu dhaqaaqo si kasta ee lagu soo dhacsan karo dalalkaas laga boobay ummadda Carbeed iyo xaqa ka maqan reer Falastiin, ayadoon waqti la lumin, tab, xeelad iyo xoog intubana waa bannaan yihiin. Waxaase shardi ah in qaranka Carbeed gebi ahaantii meel uga soo wada jeesto arrintaas, loona huro maal iyo naftaba xoreynta dalalkaas. Waxaa loo baahan yahay in laga feejignaado tabaha imberiyaaliyadda iyo sahyuuniyadda adduunku ay la damacsan yihiin in ay ku kala firdhiyaan ururka, talada iyo tayada Carbeed. Ururkaas oo damaano u ah xoreynta dalalka maqan iyo soo dhicinta xuquuqda reer Falastiin.

Isticmaarku waa cudurrada uu dhalo habka hantigoosadka ah sidii aan horeba uga soo faalloonay. Jiritaanka habkaas ayaana sababa u ah isticmaarka iyo imberiyaaliyadda adduunkaba. Waxaa la ogsoon yahay in kaddib markii isticmaarku si xoog leh ugu faafay adduunka qarnigii XVIII iyo XIX dagaal kharaar lagu qaaday oo ummadaha adduunka saddexaad ee Afrika Aasiya iyo Laatiin Ameerika ay ku qaadeen. Ayagoo kaashanaya ummadaha dalalka wax gumeysto deggan xoogaggooda horusocodka ah, iyo dalalka Hantiwadaagga ah, kuwaasoo hiil iyo hooba weligood la garab taagnaa dhaqdhaqaaqyada gobannimadoonka ah, waxaa u suuragashay in ummado badani qaateen xornimadoodii. Hase yeeshee tab iyo xeeladi kama idlaan isticmaarkii gaboobey iyo imberiyaaliyadda, oo waxay abuureen jaad hor leh oo gumeysi ah tabihiisuna ka duwan yihiin kii hore oo duugoobay, inkastoo ulucdiisu tahay kii hore oo kale. Jaadkaas waxaa loo yaqaan gumeysiga cusub. Waxaa weeye gumeysigii oo awal dalkii uu dul deggana tooskana u xukumi jirey, markii dani ku kalliftay in uu xorriyad siiyo dalkaas dadkiisa, helay tab uu dantiisa ku fushado. Tabtaasi badanaaba waxay ku timaaddaa asagoo xukunka dhaxalsiiya dad ummadda meesha deggan ay diir iyo askun wadaagaan, laakiin qabbaan u ah gumeysiga oo u fuliya danihiisa xagga siyaasadda, dhaqaalaha iyo dhaqanka intaba, iyana heysta sandareerto yar, oo ay dhaafsadeen dantii guud ee ummaddooda. Gumeysiga cusubina ku dul ilaaliyo dadkaas uu meesha dhigtay, ummadda inteeda kale. Si tabihiisu ku fulaan gumeysiga cusubi wuxuu aalaaba ku shaqaystaa qabyaaladda, gobolgoboleysiga, afafka kala duwanaantooda, diimaha, iyo dhaqaalaha oo uu u buriyo qabbaankiisa dabadhilifka u ah. Asagoo ku soo gabbanaya arrimaha mujtamaca la xiriira oon soo sheegnay, ayuu wuxuu is hortaagaa midnimada qaranka, dabadeedna waa qaybiyaa ummaddaas. Haddii midnimo qaran la waayo, qarannimada laftigeeda iyo in isku meel laga soo jeestaana waa dhimataa. Hadal kooban mabda'ii ahaa



«Qaybi oo xukun»« ayuu ku shaqeystaa. Ayadoo arrimahaas kor ku xusan iyo in kaleba maanka lagu hayo ayaa Kacaankeennu wuxuu waajib adag isaga dhigay in lala diriro jaad kasta oo gumeysi ah, kan cusub iyo kii duugoobayba. Siduu ugu caddeeyey axdigiisa koowaad ee siyaasaddiisa dibedda qodobka labaad.

## SIYAASADDA DHEX-DHEXAADKA WAXTARKA AH :

Siyaasaddayada Dibedda qodobbadeeda ku soo arooray Axdiga Koowaad ee Kacaanka waxaa ka mid ah: In siyaasaddeennu tahay dhexdhexaad wax ku ool ah. Taasi micnaheeda waxa ka mid ah in aanan qabin in lagu biiro ama darsamo gaashaanbuurta waaweyn ee dawladaha bari iyo galbeedtoona (NATO) (WARSO) iyo in arrimaha adduunka ka taagan lagu eego il caddaaladeed iyo madax furaan oon lahayn eex iyo danaysi midna, sidaasna looga garnaqo Qarammada Midoobay iyo Ururrada Adduunkaba goortii xaajo mudani nagala soo gudboonaato.

Waxay nala tahay in muddadii Kacaankeennu ka talinayey dalka, siyaasaddaas cad oon leexleexadka lahayn aan ku dhaqeyney arrimaheenna dibedda. Maantana Soomaaliya looga haysto Ururrada adduunka ka dhexeeya inay tahay dawlad dhex-dhexaad ah oo wax ku ool ah. Hadal kooban siyaasaddayadu ma aha mid ay u siman yihiin xaqa iyo xaqdarradu, ma aha mid u dhexeysa dulmiga iyo caddaaladda ee waa mid u horseedeysa xaqa, caddaaladda, sinnaanta iyo nabadda adduunka.

Dawladda Kacaanka ah ee Soomaaliya waxay maalintii Kacaanku ka curtay dalkeennaba, caddeysey in la dhowri doono wixii, heshiis ah oo si madaxbannaan Jamhuuriyadda Soomaaliyeed ula gashay, dawladaha adduunka. Muddadii ka dambeysey 21kii Oktoobar 1969kii dawladdeennu si weyn oon hagar iyo khayaana lahayn ayey ugu dadaashay dhaw-

ridda heshiisyadii dawladaha amase ururrada adduunweynuhu la galeen dalkeenna. Taasi waxay ujeeddey in aan adduunka kula dhaqanno xurmo iyo xaq dhawr, aadaminnimo iyo hab dawladeed oo toosan. Dhowrnana wixii heshiis ama ballanqaad ah oo dawladihii Soomaaliyeed galeen intii dalkayaga xorriyadda haystey. Ummadda Soomaaliyeed waa ummad hidde iyo dhaqan u leh, in ay oofiso qawlkii ay qaaddo. Waxa lagu yiqiin weligeed dhowridda ballamada iyo heshiisyada.

Kacaankeenna Hantiwadaagga ahina dhaqankaas toosan oo Soomaalidu hiddaha u lahayd ayuu sii xoojiyey, asagoo mabda'a toosan, ku dhaqaya dalkeenna. Taasina waxay sababtay in xurmada dawladaha iyo ururrada adduunku u hayaan Kacaankeenna maalinba maalinta ka dambeysa sii weynaato. Aamminaad iyo tixgelin ballaaranna aan ka hello adduunka oo idil.

## MIDAYNTA QARANKA SOOMAALIYEED :

Soomaalidu waa ummad ku nool geeska Afrika, waa qaran isku dal ah isku askuun ah, isku af ah, isku diin ah isku dhaqan ah iskuna dhaqaale ah. Sifooyinkaas oo ah kuwa qarannimada lagu aqoonsado, waa kuwa si buuxda weligood ummaddayadu u lahayd iskuna xirayey, kumanyaal sannadood. Gumeysigii Afrika qaybsaday intii uusan ummadda Soomaaliyeed soo fara gelin, waxay ahayd ummad isu talisa oo istaageerid iyo iskaashi ku nool.

Mar kasta oo gumeysigu isku dayo in uu addoonsado ummaddeenna waxaa lagu qaadi jirey dagaal kharaar oo in badan lagu jebiyey. Dagaalladaas kuwo ka mid ah waxaa Abbaanduule u ahaa Axmed Gurey. Axmed Gurey muddo dheer ayuu u beerdhigayey gumeysigii Bortuqiiska iyo Xabashada qarnigii 16aad, guulo fara badanna waa ka soo hoyey labadaas dawladood, ciidammadoodii is gaashaanbuursadey oo duullamo isdabajoog ah ku soo qaaday ummadda Soomaaliyeed. Si ay u qabsadaan Dawladdii Soomaaliyeed oo Imaan Axmed Guray u talinayey, loona yaqaanney dawladdii Awdal (Zeila).



Waxaa la wada ogsoon yahay in aan isticmaarku kolnaba ka daalin si uu ujeeddadiisa ku gaaro. Xeelad iyo xoogba asagoo ku aqdaamanaya ayuu haddii mar la jebiyo marar kale oo badan isku dayaa in uu gaaro qasadkiisa.

Sidaas awgeed isticmaarku kama raja dhigin in uu gumeysto dalkayaga, markii goobo badan uu ku jabay, sidaan soo sheegnay. Qarnigii 19aad markii waddammada reer galbeed ee Ingiriiska, Faransiiska, Jarmalka, Talyaaniga, Holland iyo Beljum ay qaybsadeen waddammada ku yaalla qaaradda Afrika waxaa qaybtaas ka saami qaatay Boqortooyadii Amxaarada. Waxaa weerar lagu soo qaaday Ummadda Soomaaliyeed oo afarta bir qable ay kaga soo duuleen si isdabajoog ah laga bilaabo 1886 Dawladaha Talyaaniga, Ingiriiska, Faransiiska iyo Amxaaradu. Sidii hiddaha u ahayd isma dhiibin shacbiga Soomaaliyeed ee dagaal kharaar oo dheer ayuu la galay dawladahaas gumeystayaasha ah oo ku tashaday in ay kala qaybsadaan ummaddaas midka ah ee Soomaaliyeed. Xeebaha Banaadir muddo 20 sannadood aan ka yarayn ayaa dadka Soomaaliyeed ku hortaagnaayeen gumeysiga Talyaaniga, ayagoo ka hub liita ayey u diideen in ciidammadiisu soo dhigaan cagta ciidda Soomaaliyeed. Waxaa taariikhdu xusuusan tahay dagaalladii lagu jebiyey Talyaaniga oo ka dhacay Marka, Luuq, Lafoole iyo kuwii kaleba.

Sidaas oo kale Faransiiska waxaa lagu qaaday dagaal kharaar markuu damcay in uu ka soo dego xeebaha Jabuuti. Xagga galbeedka dagaalladii dhex maray Boqortooyada Amxaarada iyo dadka Soomaalida ahi waa kuwo sheekadoodu caan ku tahay geeska Afrika. Waxay dagaalladaasi u diideen Amxaaradu in ay cagta soo dhigto carradii soohdiinta u ahayd Ummadda Soomaaliyeed.

Dagaalladaas gumeysiga lala dirirayey waxay socdaanba, heerkoodii ugu sarreeyey waxay gaareen horantii qarnigakan. markii abbaanduulaha uu u noqday Ummadda Soomaaliyeed geesigii caanka ahaa, Sayid Maxamed Cabdulle Xasan. Sayid Maxamed iyo ciidammadiisii waxay muddo 22 sannadood ah gaashaanka u daruureen gumeysiga Ingiriiska, Talyaaniga iyo Amxaarada. Waxay uga dhaarteen gumeysiga reer Yurub in ay foodda soo geliyaan dalkayaga gudihiisa oo waxay ku kallifeen in ay xeebo dhowra soo dhaafi waayaan muddadaas dheer. Isticmaarku wuxuu ciidammadii Sayidka kula dagaallamay Ciidanka Dhulka, Maraakiib, iyo markii taariikhda Afrikada Bari ugu horreysey, xataa dayuurado lagu duqeeyey xaruntii Sayidka, taasina waxay u suuragelisay in ay jebiyaan Ciidankii Soomaaliyeed ee Sayidku abbaanduulaha u ahaa 1921kii. Jabkaas iyo geeridii Sayidka oo ku xigtey dabadeed, waxaa gumeysiga u suurtagashay in uu ku faafo dalka oo kala qaybsado qaranka Soomaaliyeed.

Sida la ogsoon yahay qaybihii gumeysigu u kala qaybiyey dalkeenna iyo dadkeenna qarnigii 20aad waa kuwa soo socda :

1. Soomaalida Talyaanigu gumeysto.
2. Soomaalida Ingiriisku gumeysto.
3. Soomaalida Faransiisku gumeysto.
4. Soomaalida Amxaaradu gumeysato.
5. Soomaalida N.F.D. (qaybta Koonfur Galbeed Ingriisku haysto ee Keenya).

Shantaa qaybood ayaa dalkayaga loo kala qaybsaday si looga hor istaago ummaddeenna midnimada Soomaaliyeed. Hase yeeshee dagaalkii Labaad dhammaadkiisii markii dawladihii wax gumeysan jirey qaarkood jabay, ayaa waxaa suuragal noqotay in uu heer sare gaaro dagaalkii aan weligii damin



ee Ummadda Soomaaliyeed waddey, si ay midnimadeeda ku soo ceshato iyo xorriyaddeedaba. Waxaa waddanka Soomaaliyeed oo dhan ka abuurmay ururro siyaasi ah oo wacyiga dadka kor u qaaday baraarujiyana ummadda haba ugu weynaado Xisbigii S.Y.L. oo meel walba ka furmay dalalkayaga la gumeysto. Muddo dabadeed waxaa Qarammada Midoobay gooyeen in qaybtii Talyaanigu gumeysan jirey xorriyaddeeda la siiyo 1960kii. Sidoo kale labadii qaybood oo Ingiriisku gumeysan jirey tii Waqooyi ayaa markii ay dagaal siyaasi ah oo kulul muddo dheerna socday, ku qaadday, waxay ku kalliftay Ingiriisku in uu ka kaco 1960kii bishii Juun. Labadii Gobol ee Soomaaliyeed waxay isla markii gobannimadoodii ay heleenba ku dhaqaaqeen in ay isu tagaan oo abuuraan Jamhuuriyadda Soomaaliya. Hase yeeshee waxaa weli gacan ajnebi ku hoos jira Saddex Gobol oo Soomaaliyeed oo gumeysigu raaciyey, laba ka mid ah, dawladaha Etoobiya iyo Keenya. Tan Saddexaadna tahay Xeebta Soomaaliyeed ee Jabuuti oo Faransiisku gumeysto.

Siyaasadda Kacaankeennu waxay tahay, in laysu keeno oo la mideeyo dadkaas walaalaha ah oo kala maqan, qoyskaas Soomaaliyeed oo xoogga lagu kala qaybiyey, xuduudda beenta ahna la kala dhexdigay.

Waxaan wax badan ku dhawaaqnay haddana caddeyneynaa in aan dhabbe nabadeed ku dooneyno dalalka naga maqan. Annagu ku degdegi meyno in aan daadinno dhiig Afrikaan, haddaan nalaku kallifin. Taas waxaa daliil cad u ah in aan xaajadayda hor dhignay Ururka Midowga Afrika si ay uga taliyaan, arrintaasna waxaa loo saaray dhowr Madaxweyne si ay u dhex dhexaadiyaan Soomaaliya iyo Etoobiya.

Sidoo kale wada hadal darisnimo iyo xaq dhowr leh ayaan, kula xaajoonney dawladda Keenya, rabnaana in aannu si wadanno. Waxaan rajeyneynaa in wada hadalladaas nabadeed, dhalaan miro faa'iido u leh dalalkayaga Afrikaanka ah,

oo deriska ah, waxaan aamminsannahay in ay lama huraan tahay midaynta qaranka Soomaaliyeed ee xaqdarrada gumeysigu ku kala qaybiyey. Midaynta Ummadda Soomaaliyeed waxaa Kacaankayagu ku caddeeyey Axdigiisa koowaad qodobka saddexaad ee siyaasadda dibedda.

Siyaasadda dibedda oo Kacaankeenna waxaa ka mid ah in la tixgeliyo lana aqoonsado mabda'a ku dhisan wada noolaanta nabadda ah ee dawladaha adduunka. Waxay nala tahay in aysan faa'iido u keenayn ummadaha adduunka fidno iyo qalaalaase la kiciyo toona. Dagaal la huriyaana uu keeni karo halaag weyn oo ku dhaca adduunka, haddii lagu diriro hubka halista ah oo dawladaha waaweyni haystaan.

Markaan intaas niri waxay kaloo nala tahay in aan xasilloonaan waarta, iyo nabadgelyo adduuweynaha ka dhacda la helayn inta ay jiraan gumeysiga, midabtakoorka iyo sahyuuniyaddu, kuwaas oo ay ilaaliso jiritaankooda imberiyaaliyadda caalamiga ahi. Nabad kuma wada noolaan karaan nin la gumeysto iyo kii wax gumeysanayey. Nin lagu takooro midabkiisa iyo kan qaba inuu wax takooro. Nin lagu dul-nool yahay iyo kii ku dul-noolaa. Waxaa ka dhexeysa labadaa qaybood oo bani-aadamiga ahi waa cadaadin gumeysi, iyo sahyuuni, amase midabtakoor dhan ka soo jeeda, iyo halgan gobannimadoon ah, sinnaandoon ah, caddaaladdoon ah oo ay ku jiraan ummadaha la gumeysto ama la midabtakooro ee Afrika iyo waddammada Carbeed ee sahyuuniyaddu heysato.

Sidaa daraaddeed waxay noogu muuqataa in nabad waarta la heli doono goortii ummadaha la gumeysto xoroobaan, gumeysiguna ka dhammaado adduunka. Goortii midabtakoorka iyo sahyuuniyadda laga waayo adduunka. Xornimo, sinnaan iyo caddaalad taam ahna ab uu yahayba aadamigu helo. Waxaan kaloo aamminsannahay in uu dhex maro iskaashi caddaalad ku dhisani dawladaha adduunka kuwa dhaqaalahoodu heerka sare gaarey, iyo kuwa dhaqaalahoodu soo korayaba intaba. Ayadoo ay hubaal tahay in labaduba isu baahan



yihiin, aysanna kala maarmi karin. Sidaasana waxaan ku caddeynay Axdiga Koowaad ee Kacaankayaga qodobkiisa 4aad ee siyaasadda dibedda.

## DABAQADAHA BULSHADA SOOMAALIYEED

Mujtamaca Soomaaliyeed wuxuu maanta dhisayaa habka hantiwadaagga buuxa, dhaqaalihii gaarsiin lahaa, wuxuuna ka geeddi yahay hab isugu jirey baadiyannimo taabbagashay oo ummadda inteeda badani ku baaqi tahay ilaa haddeer, iyo hantigoosad soo dhalanayey oo curtay (asaan taabba gelin) ee ka curtay magaalooyinka iyo beeraha qaarkood. Waxaa fasiraaddaas u sal ah dabaqado dhawr ah oo uu ka koobmo mujtamaca Soomaaliyeed. Dabaqadihiisuna ma aha kuwa kala baxay oo dagaal cad ku kala tegey, ayna muuqato xuduudda u dhexeysa, laakiin waxaa weeye intooda badani soo dhalad, aan weli taabba gelin, aadna u kala bixin, oon ku bislaan dagaal dabaqadeed. Sababta ugu wacani sidaas waxay tahay hantida wax lagu tacbo lihideeda oo kooban. ama aan heer sare oo hantigoosad iyo shaqaale labadaba abuuri kara gaarin.

Soomaalidu ma laha warshado badan oo waaweyn, beero fara badan oo nidaam hantigoosi ah u dhisan, bunuug iyo baayacmushtar tanaad ah oo u suuro gelin kara muddadii la soo dhaafay in maalqabeen buurani ka soo baxo dalka. Haddaad kontonkii sano oo dambe dib u raacdo taariikhda ummadda, waxaad aragtaa welina muuqata dal gumeysi haysto iyo dhaqaale aad u hooseeya inay Soomaaliya runteedu ahayd, wadcigaas kama abuurmi karin maalqabeen fara badan iyo shaqaale toona. Dabaqadaha mujtamaca oon soo sheegnay waxay kala yihiin :-

B) HANTIGOOSAD
T) SHAQAALE
J) BEERALEY
X) REERGUURAA (RAACATO).

## HANTIGOOSAD :

Maalqabeenka Soomaaliyeed haddii laga eego hantida tiradeeda iyo dabaqad ahaan meesha uu salka ku hayo ama sida uu u koray, waxaad is leedahay waa jaad gooni u ah wadciga Soomaaliyeed, asey suurowdo in kuwo la mid ah Afrika laga heli karo.

Hantida wax lagu tacbo oo raasumaalka abuurta amase mood iyo nool waxa uu maalqabeenku leeyahay haddii faallo laga bixiyo dabaqadatani waxay u kala bixi kartaa qaybo yar-yar oo kala ah :-

## MAALQABEEN YAR :

Waa qaybta ugu badan maalqabeen ku-sheeggana la oran karo, kuna faafsan dalka oo idil. Waxaa soo geli kara dukaanlaha, makhaayadlaha, baabuurlaha, daarlaha, ribixa doonka ah oo ku shaqaysta lihidaas, asaan ku koobnayn in uu ka doono quutulyoonka qoyskiisa.

A) Qaybtani waxay kala yihiin kuwo tijaara iska ladan haysta, dad yar (3-5) qof uga shaqeeya faa'iidada tijaarradaas, mushaarkana ka bixiya.

Qolo ka liidata kuwaas oo ninka iyo reerkiisa, (naagta, carruurta) ay ka shaqeeyaan tijaarado uu haysto wax buuranna aan ka faa'iidin laakiin hoyaadka reerkiisa ka hela (dukaanlaha yaryar iwm.).

Xagga hantida iyo fekerkaba qolada aan kor ku soo sheegnay waa burjuwaasiyiin yaryar, oo laabta kaga talmaya mar uun in ay noqdaan maalqabeen weyn.

Qaybtaan waxaa kadeed cad ku haya maalqabeenka waaweyn, kuwaas oo ay u yihiin suuq iyo iibgeeye alaabta ay



soo waaridaan, ama ay ka ijaartaan daaraha baabuurta iwm. oo ay badeecadda ku safarsadaan ama ku gataan gudaheeda.

Waxay qarka u taagan yihiin had iyo jeer inay xantiiraan oo maalqabeenka dhexe, kaas oo ka awood badani inta la tartamo uu suuqa ka saaro. Dabadeedna waxay kuwooda xantiiray ku biiraan dabaqada weyn ee shaqaalaha saboolka ah. In yar inta tartanka iyo is-garbiska maalqabeenka ka soo baxda, xoolo qaddara yeelata oo markaas noqota maalqabeen meel dhexaad ah, ayana waa jirtaa. Marka qaybtani labadaas dhabbe ayey akhirutaankeeda ku dhammaatаa.

## MAALQABEEN DHEXE :

Waa qaybta labaad ee dabaqada maalqabeenka, waxaa lagu yaqaan hanti iska badan iyo tijaaro heer wacan gaartay, marka loo eego awoodda suuqa Soomaaliyeed iyo nolosheenna. Waxay leeyihiin hantida tacabka soo saarta ha ahaato warshado yar yar, dukaamo iyo bakhaarro iska badan qaddar baaburta wax qaaddo ah, daaro ijaar loogu jiro, beero waxyaalaha la iibgeeyo ka baxaan iwm. Qaybtaani waxay si weyn ugu xiran yihiin suuqyada adduunka hantigoosadka ah, waxay ka soo rogaan khaarijka badeecadda hadba ribixa fiican ku leh dalka gudihiisa sidoo kale waxay dibedda u iibgeeyaan wixii suuq ka leh khaarijka oo Soomaaliya laga helo. Waxaa la oran karaa waa geddisley waaweyn.

Qaybta tani ayadaa xaddida ascaarta badeecada (wixii aan dawladdu ku hayn gacanta). Marka la eego hantida iyo maskaxda intaba waxa la oran karaa in ay tahay qaybtaani golihii uu ka bulaali lahaa maalqabeenku dalkeenna.

Xiriir dhaqaale iyo siyaaso ku taagan oo ka dhexeeya suuqyada metroboliga dalalka gumeystaha ah iyo dabaqadani sidii aan horeba u niri waa jiraan waana cad yihiin.

Xagga siyaasadda raad muuqda ayaa fakarka ivo habeynta dhaqaale intaba isticmaarkii dalka gumeysan jirey kaga tegey dabaqada ayada ah, habeyntaas oo ku fadhida in suuq loo doono badeecada ajnebiga (Export Import) ama loo suuq geeyo dalalka hantigoosadka ah kheyraadka dhulkeenna oo ceeriin, waa mid tababarkii gumeysiga ka timid aadna mooddo in garashada iyo maskaxda dabaqdaan inteeda badani ku dabran tahay kuna xirxiran tahay. Xagga kale haddii laga eego maalqabeenku wuxuu ilaa xad ku xiraa qabyaaladdii dalka ka taagnayd Kacaanka hortiis. Waxaan marnaba kala bixin Kacaanka hortiis siyaasa-ku-sheeggii qabyaaladda ku dhisnaa ee dalka lagu maamuli jirey iyo tijaarada dalka. Ayadoo siyaasadda guduhu (qabyaalad) ay had iyo jeerba hoggaamineysey heerka tijaarada ama xoola tacbashada fardiga maalqabeenka ah xoolo u ka dhaqan karo dalka gudihiisa. Sida loo kala garab ama gerger weynaa, ayaa xagga maalkana, sida qaalibka ah, loogu kala gaashaanbuuraa. Amba ninba ninkii uu ka cod siyaasi ah badan yahay, ayey u suurageli jirtey in uu lacagta culus (valuto) shatiyada, wax lagu iibgeeyo iyo bunuugta deynkooda intaba uga dhowaado, awoodna u lahaa in uu qayb libaax ka helo xoolahaas. Arrintatan aan soo fasirray laftigeeda waxay ku fadhidey qorshaha isticmaarka cusub oo dantiisu tahay inta qabyaaladda laga dhigto jaranjaro in la abuuro maalqabeen Afrikaan ah oo ku qotoma qabyaalad, kuna xoolo tacbaday siyaaso qabiili ah. Taas oo ujeeddadeedu tahay in dabaqadaasi dhinaca hantida kaga xirraato suuqa imberiyaaliismada iyo isticmaarka, waxa hadba laga soo warido ama loo iibgeeyo, dhinaca siyaasaddana gumeysiga cusub siduu rabo iyo qabyaaladda dalalka Afrika ka taagan. Qabyaaladdaas oo had iyo jeerba hortaagan in maalqabeenku uu ciyaaro dowr waddani ah, oo cad oo ujeedda sanaaco waddanku leeyahay inay dhalato, lagana xoroobo gumeysiga dhaqaalaha, iyo ku xirraanta ajnabiga. Kaalintaas ma buuxin maalqabeenka Soomaaliyeed mana ku tala jirin, sababtoo ah in midba meel ka soo jeeday asagoo qabiil ku xiran, aamminna la waayey ay maalka



isu geystaan oo warshado ama mashaariic waaweyn ay waddanka kaga sameeyaan.

Waxay ku koreen baaqina ku ahaayeen (Kacaanka hortiis) qaybi oo xukntii isticmaarku u qorsheeyey, qabyaaladduna salka u ahayd. Sidaas awgeed hantidoodu in doontoo ay le'eg tahay culays la tuujin karo kuma yeelan dhaqaalaha dalka (ka hadli mayno ajnabiga).

## SHAQAALAHA SOOMAALIYEED :

Dabaqadaha ummaddeennu u qaybsan tahay waxaa ka mid ah shaqaalaha bal aan isku dayo in aan faallo gaaban ka bixiyo dabaqadaan.

Iskeedabana bal aan iswyediinno yaa shaqaale la oran karaa dalkeenna oo ku sifoobi kara? Waxay ila tahay in aan Soomaaliya Kacaanka hortiis gaarin heerkii hantigoosadka buuxa kaga dhismi lahaa dalka. Habkaas oo wadan lahaa laba dabaqadood oo loo yaqaan maalqabeen iyo shaqaale, kuwaas oo had iyo jeerba iska horjeeda dagaal iyo cadaadinna ka dhexeyso. Sidaan horey u niri waxaa Kacaanku curtay ayadoo lagu jiro hab labeeb ah oo isugu jira reer baadiyannimo (ama bidaa'innimo), taabbagashay kuna shaacday dalka, dadka intiisa badanina ku abtirsato iyo hantigoosad soo dhalanayey oo inta yar ee magaalooyinka iyo beeraha waaweyn leh ku fadhiya kana hanaqaaday.

Taas micnaheedu wuxuu yahay in aan shaqaale ku sal leh warshado, mushtar weyn, beero waaweyn intaba midna uusan abuurmin, maxaa wacay, wixii abuuri lahaa ayaa maqnaa. Halkaas waxaa ka cad in uusan wax la sheegi karo ahayn shaqaalihii hantigoosadka la koray oo la magac baxay broletarigu. Hase yeeshee, taas micnaheedu ma aha in aan waddanka dabaqad shaqaale la oran karo oo muruqeeda maashaahi jirin. Waxaan u dan lahaa in la fahmo in sida maalqa-

beenka Soomaaliyeed aan ugu fasiray mid jaad gooni ah, sidaas oo kale ayaa marxaladda ama heerkii aan soo sheegnay ee horukaceennu, wuxuu sababay in aan u fasiranno shaqaale micne ka ballaaran kan warshadaha oo keliya.

Waxaa wadcigayaga shaqaale ama xoogsato la oran karaa, hadda ka horna aan in badan ku sheegnay qaybaha soo socda :

1. Shaqaalaha warshadaha,
2. Shaqaalaha beeraha,
3. Shaqaalaha dawladda,
Ciidammada qalabka sida,
5. Hantiyaraha iskii u shaqaysta.

Intaas waxaa soo raaca qayb ballaaran oo shaqaale ku-sheeg ah (sotto proletariato) oo balad iyo baadiye intaba ku faafsan oo maalinna qada maalinna quudata. Intaasi waxay tahay qaybaha ay u kala baxdo dabaqada shaqaalaha ama xoogsatada la yiraahdo.

## BEERALEYDA SOOMAALIYEED :

Beeraleydu waa dabaqada iyaga iyo shaqaaluhu salka u ah Kacaan Hantiwadaag ah meel kastaba ha ka dhashee dunida, marka beeraleyda la kala saarana beeraleyda yaryar iyo shaqaale beeraley (Proletariat and Semiproletariat) oo ah guutada aalaaba ugu badan qaybaha dabaqada (Class) beeraleyda, ayaa is garab taaga shaqaalaha si lagu dhaliyo Kacaan Hantiwadaag ah, dabadeedna lagu wado dawlad hantiwadaag ah. Arrintaas Lenin wuxuu ka yiri : «Waddammada adduunkoo dhan shaqaalaha iyo danyarta beeraleyda ah oo is bahaysta ayaa waxay yihiin asaaskii ama guntii xarakada runta ah oo hantiwadaagga ah».

Beeraleyda Soomaaliyeed ayadoo ka mid ah kooxaha ama dabaqadaha mujtamaca Soomaaliyeed, ayey misna waxay u kala baxdaa, guutooyin kala sareeya oo ku dhexjira dabaqada gudaheeda, kuwaas oo sidaan horey u niri kala ah:



B) Beeraley waaweyn.
T) Beeraley meel dhexaad ah.
J ) Beeraley yaryar.
X) Shaqaale beeraley.

Waxay ku habboon tahay marka in la faaleeyo guuto walba sida ay ku sugan tahay dalkeenna iyo hantida ay leedahay taas oo muujin karta mawqifka guuto waliba ka istaagi karto Kacaanka Soomaaliyeed ee hantiwadaagga ah.

## BEERALEY WAAWEYN :

Guutadatani waxaa weeye dad beero waaweyn leh beerahaas oo u nidaamsan isuguna dubadhacay si weyn, habka wax soo saarka iyo wax iibinta ribix doonkuna ay tahay mid ku fadhida tijaaro hantigoosi ah (Capitalist mode of production) beeraha guutadatan waxaa loo yaqaan «Azienda» waxayna dhulka ku fashaan oo awood u leeyihiin makiinado kala jaadjaad ah iyo qalabka cusub oo beeraha lagu falo.

Xagga shaqaalaha guutadaani waxay ku adeegtaan oo uga shaqeeya beerahooda shaqaale beeraley iyo shaqaale ku sheeg (semi proletariat), kuwaas oo ay qortaan hadba xiligii ay u baahdaan dabadeedna ay ruqseeyaan. Beeraha guutadaani waxay ku yaallaan labada Webi (Juba iyo Shabeele) dhinacyadooda inta badanna waxay beeraan muus dibedda loo iibgeeyo, ama jaadad kale oo miro beereed ah looguna talagalay iib suuqa dalka ama kan dibedda loo iibgeeyo.

## BEERALEY MEEL DHEXAAD :

Guutadatani waa ka badan tahay tii hore ee beeraleyda waaweyn waxayna ku firiirsan tahay dalka oo dhan, hase yeeshee habka wax soo saarka iyo shaqada nidaamkeedu kama duwana wax badan guutadii hore.

Beeraleyda meel dhexaadka ah waxay ayana ku adeegtaan qalab beereed oo kala duwan iyo shaqaale beeraley indoontoo tabartoodu aalaaba ayan u suuro gelin karin in ay lihi u yeeshaan qalabka waaweyn ee beeraha lagaga shaqeeyo sida Taraktorada, Bumbooyika iwm. Haddana waxay qalabkaas ka ijaartaan beeraleyda waaweyn kuwaas iyo guutadatan oo calaqaad is weydaarsi aqooneed iyo qalabba uu ka dhexeeyo. Waxaa la oran karaa in habka wax soo saarka guutadatani yahay mid maalqabeen (Capitalist mode of production). Taas oo ay u daliil tahay shaqaalaha la ijaarto ka sokow, iibgeynta badeecadda ka baxda beerahooda oo mid ninka lihi uu ribix ku doono ah ee aan badanaaba ahayn tu quutulyoonka reerka beerta leh ku filan oo keliya ,sida guutada beeraleyda yaryar oon ayana markeeda hoos ku faaleyn doonno.

Beeraleyda guutadatani waxaa la oran karaa ama lagu magacaabi karaa gedisley beereed, taas oo micnaheedu yahay in ay beeraan xilli walba waxa ay is leeyihiin suuqa gudaha ama kan dibedda ayey qiimo wacan ka joogaan ha ahaadeen waxa ay beerahayaani, muus, sisin, lows, suuf iwm. Dabadeedna ay u iib geeyaan magaalooyinka waaweyn iyo suuqyada dibeddaba. kuna gedistaan waxooda ama badeeca kale ama waxay kala baxaan lacag caddaan ah, markaas ayey marlabaad misna beerid kale ugu noqdaan wixii hadba xiligaas la joogo la gudboonaada, markay indhaindheeyaan suuqa.

Dabaqada dadka beera noocaan ah lihi waa hantile dhexe, hantida wax soo saarta ama lihida heerka ay ka joogaan ayaana sumaddaas burjuwaasinimada ah, ugu wacan. Dadka guutadatani waxaa la oran karaa in ay u badan yihiin dad aan u go' doomin beerafalasho oo keliya ee tijaaro kale ama xirfado kale ku leh magaalada, wax kororsi ahaan ayey beeraha u galaan tacabkooda.



## BEERALEY YARYAR :

Waa guutada ugu fara badan dabaqada beeraleyda, haddii laga eego xagga lahaanta qalabka wax lagu soo saaro, ama wax soo saarka waxay wax yar ka sarreeyaan ama u dhowyihiin Shaqaalaha Beeraha. Hantida guutadatani waxay ku kooban tahay beer yar oo ½ Hektaar ah oo reerka beeraleyda ah uu roobka kaga beerto wax hoyaad ugu filan xaaska. In ka mid ah guutaduna waxay marna ku shaqeeyaan shaqaale nimo, beeraha waaweyn oo guutooyinka aan soo sheegnay, marka kalena waxay fashaan gobol yar oo ayagu iska leeyihiin, taas oo ay ugu wacan tahay baahida reerkooda oo ay nan ku fileyn waxa aalaaba ka soo baxa beerahooda yar yar.

Guutadan dadkeedu sidaan horey u niri wuxuusan ka fogeyn shaqaale beereed in uu noqdo, taas oo hantidiisa yaraanteedu inta badan ku kallifto in uu noqdo, markaasna muruqiisa kaga shaqaysto beeraha maalqabeenka.

Dhaqaalaha gobollada iyo degmooyinka Soomaaliyeed oo guutadatani ku faafsan tahay, waa kala duwan yahay. Kala duwanaantaasi waxay sabab u noqotaa in dadka qaarkii marka roobku da'ana gobol yar oo dhul ah, yaambo ku fasho, markii xilliga roobka laga baxana uu bar xoolaad hadduu leeyahay la guuro, taas oo ka dhigta beeraley xooladhaqato ah (Semi Peasant) waxaa dadkaasi ku cayntaa xilliga beeruhu xumaadaan oo ay u baxsadaan xoolaha ay leeyihiin, qaar kalena marka roobka ama biyaha daadka ah oo webigu guraan wixii hadba u baxana ay goostaan, waxaas oo sidii aannu niri aan hoyaadka reerka ka badneyn, waxay isu beddelaan shaqaale beeraley, marmarna waxaaba dhacda gobollada qaarkood inay inta ka haajiraan, ay shaqo u doontaan beerihii maalqabeenka, halkaas oo wax ayna kuna dhiman kuna nooleyn oo ijaar ah lagu siiyo.

SHAQAALE BEERALEY :

Guutadatani waa guuto aan yareyn waana tan ugu saboolsan xagga hantida ama lihida haddii laga eego qalabka wax soo saara heerka ay ka taagan yihiin oo ah saboolnimo. ayaa waxay ku kalliftay in ay muruqooda ijaaraan, shaqadoodana ka iibshaan beeraleyda maalqabeenka ah (kuwa weyn iyo kuwa dhexe), xilligii ama waqtigii maalqabeenkaasi uu u baahdo in loo falo ama loo tacbo, ama loo waraabiyo, ama loo geedqaado, ama loo guro miraha, beerahooda ku faafsan dalka bacrinta ah ee Soomaaliyeed. Guutadani marka xag shaqo iyo xag lihi hantiyeed labadaba laga fiirsho waxba kagama geddisna shaqaalaha kale ee dhaqaalaha xubnihiisa ka shaqeeya, markaas waxaan niri waxa weeye «Shaqaale beeraley» oo isugu jira (proletariat iyo semi proletariat).

Guutadatani waxay ku aruursan tahay beeraha waaweyn (Azienda» iyo kuwa dhexe ee maalqabeenka agagaarkooda. Halkaas oo ay subax noolba ku kallahaan beerahaas ayagoo shaqa-doon ah, intoodii loo baahdaana ay ka shaqeeyaan beerahaas ayaga ah. Haddaan isku daynay in aan faallo kooban ka bixinno dabaqada beeraleyda la yiraahdo iyo guutooyinkeeda waxaa ayana loo baahan yahay in la garto mawqifka guuto waliba ka istaagi karto Kacaanka Hantiwadaagga ah ee Soomaaliyeed.

Hantiwadaagga Cilmiga ku dhisani sida uu na barahayo koox ama dabaqa kasta (Class) oo ka mid ah mujtamaca waxaa tilmaan cad u ah, oo ku xirta, ama ka fogeysa Kacaan Hantiwadaag ah, hadba inta uu le'eg yahay xiriirka ka dhexeeya dabaqadahaas iyo hantida wax soo saarta ama lihida. Lihidaas inta dabaqad waliba u jirto ayaa sabab u ah horusocodnimada (progressive) ama dibusocodnimada (reactonary) lihidu waxay dabaqadaha binu-aadmiga u kala qaybisaa mid wax leh iyo mid aan wax lahayn, maalqabeen iyo shaqaale, waxaa markaas iska cad oo taarriikhda iyo dhaqaaluhuba ku barayaan in, dabaqa waliba leedahay dana gooni u ah oo ka soo horjeeda kuwa dabaqadaha kale oo aan marnaba heshiin karin. Sababtuna waxay tahay ayadoo dabaqaduhu marka leysku qaado u kala baxaan dabaqad kadeedan (Exploited class) oo laga kadeedday xag dhaqaale iyo xag siyaaso, iyo baqad wax kadeedda (Exploiter class) oo wax ku kadeedda ama ku gumeysata lihida taas oo ay ka xigto ama ka leedahay dabaqadaha kale qalabka wax lagu soo saaro.



Markis iyo Englis waxay arrintaas ka yiraahdeen markey qorayeen warkii caddaa oo ay soo saareen (Manifesto )«taarikhda mujtamac kasta oo jirey ama -jira waq tiga haatan la joogo waa taariikh dagaal dabaqada dhexmaray kuwaas oo u kala baxayey xor iyo addoon, gob iyo gun nin dhul leh iyo mid doon fuul ah. Hadal iyo dhammaantii in kadeedan (oppressed) iyo in kadeedda (oppresser), weligood waa is leyn jireen, waxaana ka dhexeyn jirey dagaal joogta ah, ama ha ahaado qarsoodi ama caddaan. Dagaalkaas oo mar walba ku dhammaan jirey ama isbeddel Kacaan ah, oo ku dhaca mujtamaca oo dhan, ama halaag guud ahaaneed oo ku dhaca dabaqadaha dagaallamayey».

Intaasi waxay muujinaysaa dabaqadaha mujtamaca sida ay u kala fogeyso lihidu, ayadoo midna ka sara marisa tan kale. Haddaan u soo noqonno dabaqada beeraleyda ah ee dalkeenna waxaa cad in beeraleyda waaweyni iyo tan dhexe ay yihiin guutooyin kadeede ah, waxaa taana ugu wacan sidii aan u niri maalqabeennimada.

Xagga kalena waxaa cad in guutooyinka beeraleyda yaryar iyo kuwa shaqaale beeraley ah, labaduba yihiin guutooyin kadeedan. Kacaanka hantiwadaagga ihi wuxuu u daneeyaa dabaqada ama guutada kadeedan ee mujtamaca ku

jirta, taas oo uu ka xoreeyo kadeedka iyo isku dulnoolaansha-ha dabaqadi ku dulnoolaato dabaqad kale. Taas oo keenta in aan marnaba loo sinneyn barwaaqada ee ninka muruqiisa iyo dhididkiisa ku tacbaana maalinna ka quuto maalinna ka qado, kan aan asagu xoojin laakiin lihida wax lagu tacbo lihina ku raaxeysto miraha ay dhasho shaqada xoogsatadu.

Haddaan soo koobno waxaan oran karnaa in marka dib loogu noqdo wadcigeenna Soomaaliyeed shaqaalaha bee-raha iyo beeraleyda yaryari yihiin labada guuto oo xoogagga horusocodka ka mid ah. Haddii shaqo cad oo hanuunin iyo kicin tawrinimo ah laga qabtana garabka iyo taageerada u noqon kara dabaqada kale oo ah shaqaale weynaha Soo-maaliyeed.

## ISKAASHIGA BEERAHA

Sida mabda'a hantiwadaagga ahi qabo hantida taalla waddan hantiwadaag ah oo raasumaalka abuurtaa waa inay u kala baxdaa labo siyaabood:-

a) Hanti qaranku leeyahay oo ka dhexeysa dadwey-naha oo dhan.

b) Hanti dadku leeyahay ayagoo iskaashanaya, isuna geysta xoog iyo xoolo wuxuu heli karo. Wadcigeenna khaas-ka ah ee Soomaaliyeed marxaladda la marayo oo dhismaha hantiwadaagga, waxan la diidi karin hanti saddexaad oo ah tan qofku keligii leeyahay. Ha ahaado maalqabeen yar, ama mid dhexe intuba waa jiraan dalkeenna.

Iskaashiigu waa tiir weyn oo ka mid ah tiirarka hanti-wadaagga cilmiga ku dhisan. Haddii wadcigayaga Soomaa-liyeed la baarana waxaa cad in marka laga hadlayo beeraha ama dhulka wax laga beeri karo aysan marnaba dhul weyto jirin oo iskaashatooyin fara badani dhismi karaan.



Taasna waxaa u daliil ah in Soomaaliya dhulka wax ka bixi karaan lagu qiyaasay 8 milyan oo Hektaar. Siddeedd-daas, 2 milyan waa la waraabin karaa - haddii loo dhabba-galay inta maanta ka beeran dhulkaas faraha badan waxaa la ogaaday in boqolkiiba toban 10% wax ka yari beeran tahay. Taas micnaheedu wuxuu yahay in talada habbooni tahay sidii degdeg loogu islaaxin lahaa dhulka faraha ba-dan oon weli salaax u ahayn beeridda. Islaaxintaas waxaa lagu gaari karaa ayadoo :-

1. Laga baxo yaambada keligeed wax lagu falo, oo lagu shaqeeyo laguna falo beeraha xoogga xoolaha iyo kan makiinadaha cusub intaba.

2. Beeraleyda oo iskaashi ku shaqeysa.

3. Ayadoo jaan-gooyo iyo dhiirinimo gelin cad dadka beeraleyda danyarta ah, lagu siiyo hawsha iskaashiga iyo isu-tagga.

## DHAQANKA BULSHADA SOOMMAALIYEED

Ummaddeenna Soomaaliyeed waa dad taariikh dheer, hidde iyo dhaqan dhaxalgal ah leh. Waa ummad ku nool Geesta Afrika oo ku caan ah af, diin, caadooyin iyo askun isku mid ah Soomaalidu waxay ku nooshahay dhul berin, buur, bacrin, biyo webi iyo bad weyn intaba leh.

Dhul sida la ogsoon yahay ku fiican xoola dhaqasha-da iyo carro bacrin ah oo beeraha ku habboon intaba waa lee-yahay, intaasi waa ayniga ama sifooyinka lagu tilmaansan karo dalkayaga iyo dadkiisa. Haddii loo dhabbagalo sifoo-yinka aan soo sheegnay oo hoos loo sii derso joqoraafiga, taa-riikhda, cilmiga bulshada intaba waxa kuu soo baxaya, in ay jiraan arrimo badan oo bulshada Soomaalida ah, lagu ya-qaan keligeed oo dhaqaalaheeda iyo dhaqankeedu ku fadhi-yaan.

## DHAQAALAHA :

Soomaalida inteeda badani waa xoolodhaqato, xoolaha ay dhaqato waa geela, lo'da iyo ariga. Ariga ayaa ugu badan tirada, lo'daa ku xigta, geelaa ku xiga. Xoolaaleyda Soomaaliyeed dalka afratiisa birqable waa deggan tahay, abaartana ceelasha waaweyn ayaa hareerahooda beeshu isugu soo guurtaa, waqtiga barwaaqadana qoys waliba meeshii uu doono oo naq iyo biyo u leh xoolihiisa ayuu degaa.

Dhaqaalaha jaadkaas ah ayaa nolol u ahaa kumanyaal sannadood dadkayaga intiisa badan, maantana uu baaqi ku yahay. Dhaqaalahaas waxaa la oran karaa waa bidaa'i, (primitive) haddii si loo eego, hase yeeshee hantida wax tacabta ama xoolaha lama wada laha sida lagu aqoon jirey mujtamacyada bidaa'iga wada hantilaha ahaa (primitive comunal) oo Afrika ama Aasiya laga heli karo haddaba. Xoolaha Soomaalidu waa kala leedahay, qoys waliba qaddar halo ama saco ah, iyo ari qiyaas ah ayuu leeyahay, indoontoo nacfiga xoolahaas, aan loo diidin qoys u baahda in la maaliyo sida caadadu tahay, haddana lihida waxaa leh reer la yaqaan, halkaas waxaad ka aragtaa in lihi gaar ahaaneed jirto oo aan ka duwanyen ninka daarta ama doonta, ama beerta leh. Ha yeeshee badanaaba jeeska (adooga, xaaska, carruurta) xoolaha leh ayaa ka shaqeeya soofintooda baytintooda iyo shubiddooda intaba. Sida qaalibka ah qowsaar ama shaqaale kuma shaqeystaan xolaleyda badankoodu (waa jiraan dad xoolo badan leh oo loo raaco), halkaas waxaa ka maqan jaad kastaba ha ahaadee isku dulnoolaansho ama iskadeed qofka lagu dulnool yahay oo shaqaalaha la kadeedo. Sida lagu yaqaan mujtamaca hantigoosiga ah.

Waxaa marka la oran karaa in dadkaas xoolaleyda ahi ay ka duwan yihiin mujtamaca jooga heerka dhulgoosiga iyo kan hantigoosiga intaba indoonto oo aan si buuxda loogu



sifeyn karin marxaladda ugu hooseysa mujtamaca dhaqankiisa oo aan soo sheegnay ahna bidaa'iga xoolaha la wada lahaa. Waxaadse oran kartaa haddaad si cilmiya u faaqiddo nolosha xoola-dhaqatada Soomaaliyeed iyo taariikheedu siday isu beddeshey in maanta heerka ay ku sugan tahay yahay mid isugu jira marxalado kala jaad ah oo kala sarreeya. Waxaa la oran karaa «Bidaa'i hantile ah» taas oo micnaheedu yahay dhaqanka bulshaduna inuu bidaa'i yahay, marka laga eego dhaqaalaha ama xagga lihida (milkiyadda) in uu yahay hantile aan ka duwaneyn ninka hantida kala leh (baabuur, guri iwm.).

## DHAQANKA XOOLA-DHAQATADA

Dhaqaala kastaaba wuxuu sal u yahay dhaqan gaar ah oo lagu yaqaan heerka dhaqaalahaasi joogo. Reer baadiyaha Soomaaliyeed wuxuu dhaqan ahaan ku caan yahay arrimaha soo socda :-

A) Xeer.
B) Diin.
T) Caadooyin.
J) Murti.

## XEERKA SOOMAALIYEED :

Ummadda Soomaaliyeed waa dad isku xeer ah, dhaqaalihii aan soo sheegnay heerka uu joogo ayaa wuxuu sababay in habka maamulka iyo xukunka baadiyuhu ku fariisto xeer. Xeerarkaasi kama duwana qawaaniinta kuwa ugu xeesha dheer ee adduunka beelu isku dhaqdo. Waxaa la wada ogsoon yahay intii aan gumeystuhu dalka imaan horteed iyo kaddibba Soomaali inteeda badani in ay ahayd mujtamac isu taliya, isdaafaca, iskaashada oo si caafimaad qabta u nool, kuna dhisan istaageerid iyo gargaar. Mujtamacaasi,

dawlad, xabsiyo, askaro iyo maxkamado ma lahayn, wuxuu ku qotomay xeerka iyo xamaaska dadka Soomaalida ahi ka-ab ka-ab ku dhaqmi jirey. Nin diidi kara ama shaki gelin karaana uusan jirin. Xeerkaas wuxuu xaddidi jirey dembiyada iyo ciqaabtooda, abaalgudka, soohdinta, ceelasha iyo daaqa, xoolaha iyo dhaqankooda, reerka dhismihiisa iyo carruurta xannaanadeeda, xushmada iyo xilka waayeelka iyo qaraabada. Hadal iyo dhammaantii nolosha mujtamaca oo idil waxay ku xaddidneyd xeerka u yaalley beesha Soomaaliyeed kaas oon marnaba lagu xad gudbi jirin.

## DIINTA ISLAAMKA :

Diintu waxay dalkayaga timid intii aysan ka tallaabin xaruntii quraanku ku soo degey, (Maka, Madiina) oo aysan u tallaabin ardiyadii kale taasna daliil badan oo taariikh ah ayaa sugahaya. Ummadda Soomaaliyeed sidii aan horey uga faalloonnay waa muslim kulli ahaanteed, xeerkeeda oo ka horreeyey diinta, iyo caadooyinkeeduba waxay inta badan ama sal ku leeyihin ama waafaqsan yihiin diinta. Xurmada iyo xaqdhowrka aadamiga, istaageeridda iyo martisoorka, xumaata ka dhawrsiga iyo aflagaadda diidka, addeecidda waalidka iyo iska dambeynta xaaska, allabariga iyo sadaqda, xarragada iyo xashaashka intuba waa arrimo ku lug leh diinta islaamka.

## CAADOOYINKA :

Caadooyinku waxay la dhasheen jiritaanka ummadda Soomaaliyeed ifka u soo baxday, qaar fasiraad diini ah leh iyo kuwo islaamkaba waa ka horreeyeen aad oran karto intaba waa leeyihiin, caadooyin xun iyo kuwo san intuba waa jiraan. Sidoodabana waxay ku xiran yihiin hadba heerka ilbaxnimada mujtamacu gaarto iyo aqoontiisa.

Waxaan isku daynay in aan wax ka niraahno dhaqaalaha gunta u ah reer guuraaga Soomaaliyeed oo ah hantida xoolaha ee qofk ama qofku iska leeyahay, iyo dhaqaalahaasi dhaqanka uu ku rakiban yahay. Ummadda Soomaaliyeed inteeda badani hadday xooladhaqato reer baadiye ah tahay, waxaa kaloo jira in qaddaro (20 - 30%) oo beeraley ah.



## DIINTA IYO HANTIWADAAGGA

Kacaankeenna barakaysani markii uu ka curtay dalka oon qaadanay mabda'a hantiwadaagga cilmiga ku dhisan, waxaa dib u socodka dalka gudihiisa jooga, iyo dad dibedda ka jooga Soomaaliya ay isku dayeen inay faafiyaan fikrad qalad ah oo oraneysa hantiwadaagga aan qaadannay waa diin la'aan waana mabda'a ummadda diinteeda wax loogu dhibahayo.

Waxaan isku daynay in badan in aan fasirro hantiwadaagga iyo diinta sida aaney marnaba wadcigayaga Soomaaliyeed isu diideyn iska hor imaadna uusan uga dhalan karin, xagga horukaca iyo xagga dhaqanka midkii laga eegaba, hayeeshee waxay nala tahay in loo baahan yahay in aan sii fah faahinno oo mar kale si cad u muujinno arrimaha diinta iyo hantiwadaagga dalkeenna.

Dadka Soomaaliyeed boqolkiiba boqol waa dad muslim ah, islaamnimadu waa dad ay aad ugu dheertahay, hiddaha iyo dhaqanka Soomaaliyeed, diintu boqollaal sano ayey la xiriirtay waxaa la oran karaa in diinta islaamku wax badan oo horukac ah ku kordhisay mujtamaca Soomaaliyeed, haddii laga eego xagga siyaasadda, xagga dhaqanka iyo xagga asluubta intaaba.

Haddii taariikhda la eego, adduunkana horumarkiisa kaalin weyn ayey ka gashay diinta islaamku, waxaa la wada ogsoon yahay in casrigii Yurub mugdiga gudeysey, islaamku kor u qaaday heer sarena gaarsiiyey aqoonta binu aadmiga, iyo cilmiga lagu maamulo xidigaha, xisaabaha, dhismaha, kiimiyada, falsafada iwm.

## XAGGA SIYAASADDA

Xagga siyaasadda haddaan ka eegno halgankii geesiyadii Ummadda Soomaaliyeed oo la dagaallamayey isticmaarka, waxaa tiir aan licin iyo calan intaaba u ahaa diinta islaamka, oo ayagana isku xireysey iskuna dumeysey quluubtooda, hub adag iyo niyo bir ahna siineysay, taas oo u suuragelisey in geesigii Axmed Gurey iyo geesigii Sayid Maxamed Cabdulle Xasan oo ka dambeeyey, labaduba in muddo dheer ay dagaal ku qaadaan gumeysiga caddaan iyo madowba sida la wada ogsoon yahayna guulo fara badan inay ka soo hoyeen. Haddii Soomaaliya maanta dad sharaf iyo haybad leh oo gumeysigu liidi kari waayey ay tahay, waxaa ku mahad leh Alle iyo geesiyaasha diinta islaamka haystey oo la jahaadey gumeysiga, waxaa taariikhda ku cad in isugeynta Ummadda Soomaalieed wax ku dhaqaaqa ay geesiyaashaasi ugu horreeyeen, xiriirka ugu weyn ee dadka isku xiraayeyna ay diinta iyo dhalashada Soomaalinimada ah ahaayeen oo dadku garto, dabadeedna isku meel ka soo jeesto.

## XAGGA DHAQANKA

Ummad dhowrsan oo waxa xun ka xishoota waxa sanna ku faanta ayaa lagu yiqiin dadkayaga, intii aan isticmaarka iyo dabadhilifyadiisu dadka kala qaybin oo waranka isugu dhiibin. Soomaali dhexdeeda ammaan buuxa ayaa ooli jirey, dilka iyo dhaca iyo tuugada intuba wax laga xishoodo ayey ahaayeen, waxaa qofka xirahayey, oo u diidahayey xumaanta aan soo sheegnay fakarka diiniga ah oo lagu soo ababiyey qofka Soomaaliyeed.

Waxaa ayana jirtay in wada noolaanta meel la wada deggan yahay oo xeer ka dhexeeyo dadka iyana ay gundhig u ahayd sugidda akhlaaqda habboon oo xumaata ka dhawrsiga ah



ee qofka kalsooni ku siineysa naftiisa. Kaalinta diinta islaamku kaga jirto nolosha ummaddu intaas waa ka ballaadhan tahay xaggii loo eegaba, marka dhab ahaan loo fahmo waxtarka ay diintu u leedahay abuuridda akhlaaqda qofka Soomaaliga ah, oo soo korahaya ayadoo la ogsoon yahay in aaminidda diintu la xiriirto qofka laga bilaabo maalintii uu dhasho ilaa maalinta uu dhinto iyo dabeecadda quman oo ay ku beerto waanada iyo wacyiga diiniga ahi qofka naftiisa, marka la xusuusan yahay inay diintu adkayneysey Soomaalinimada iyo qiirada waddaninimada ah, oo lagula dagaallamahayey gumeysiga, marka aqoon loo leeyhay in diintu ka soo horjeeddo dib u socodka, isticmaarka iyo dulliga ay dhaliyaan gaajada, faqriga iyo jahliguba, markii ay sugan tahay in diinta islaamku gacan weyn ka geysan karto kicinta iyo baraarujinta iyo isku dubbarididda Ummadda Soomaaliyeed oo dhisaysa maanta hantiwadaagga cilmiga ku dhisan, intaas oo dhan marka maskaxda iyo maanka lagu hayo waxaa cad oo garadka qofku leeyahay, iyo aqoonta waaqica runta ah oo Soomaali ku sugan tahay la aqoodo intuba ay ku siinahayaan, in diinta islaamku haddii laga dhawro kitaab gaablaha marnaba aysan hor istaageyn, diideyn hantiwadaagga cilmiga ku qotomo oo aan qaadannay.

Haddaan ka eegno dhanka kalena mabda'a laftigiisu ma diidsana kamana soo horjeedo baabi'inna maayo diinta islaamka, mabda'u waa dhabbihii Ummadda Soomaaliyeed gaarsiin lahaa horukac dhaqso ah oo dhaqaale iyo siyaasaba, waa hubkii aan kula diriraynay cadawga Soomaaliyeed ha joogo dalka gudihiisa hase jiro dibaddiisa.

Waa iftiinkii aqoondarrida ka saarahayay dadkayaga, waa horseedkii shaqada lagu barwaaqeynahayo dalkayaga oo aan kaga bixi lahayn si dhaqsaleh gaajada, waa dawadii aan kula diriraynay cudurrada dadka haya ha ahaadeen kuwa

maanka qofku ka jirrado (aqoondarrida gumeysigu ku reebo maanka) iyo jirka intaba. Diintu waxay ka mid tahay umuuraha la xiriira waaqica runta ah oo dadkayaga, umuurahaas waxaa ka mid ah heerarka dabaqadaha kala geddisan oo dadka Soomaaliyeed ay ku sugan yihiin iyo iska hor imaadka iyo cadaadinta ama is diidanaanta dabaqadu dabaqada kale ka soo hojeeddo, waxaa ka mid ah mujtamaca Soomaaliyeed sida uu u nool yahay iyo arrimaha kale ee la xiriira.

## ARRIMAHA HANTIWADAAGGA IYO DIINTA

1) Hantiwadaaggu wuxuu qabaa oo tiirarkiisa waaweyn ka mid ah kadeed iyo isku dul noolaansho, qof ku dul noolaado qofka kale in la baabi'iyo.
2) Caddaalad iyo sinnaan dadku barwaaqada iyo shaqadaba u sinan yahya xaqna u leeyahay qofku shaqada iyo wixii uu shaqeysto. Halheyskuna waa «Qof waliba intuu karaankii shaqaystuu leeyahay».
3) Hantida wax soo saarta inay ummaddu leedahay oon qof kaligii ku tasarufin kana cunaqabatayn karin inta kale.
4) Tacliinta, caafimaadka, nasashada, intaaba in loo sinan yahay qof walibana xaq u leeyahay haddii uu u baahdo.
5) Danta guud in ay ka sarreyso tan fardiga, oo iskaashigu yahay salkii wada noolaanta mujtamaca iyo wax wada qabsigiisa xagga dhaqaalaha.

Arrimahaas aan soo sheegnay oo ka mid ah tiirarka ugu waaweyn ee hantiwadaagga cilmiga ku dhisani ku fadhiyo, waxaa la oran karaa midkood ma diidana diinteenna islaamku haddii laga dhawro kitaab gaablaha, iyo masala halawga hantiwadaagga sheegta, waxaan shaki ku jirin in intaaba diintu ayidsantahay oo aad u garab siineyso. Quraanka iyo xadiiska waxaa ka buuxa daliil intaaba caddeynaya, waxaanna shaki



ku jirin in islaamku yahay diin aan oggoleyn : xaqdarrada, caddaalad xumada, iskudulnoolaadka, oggolna wax wada qabsiga iyo danta guud in had iyo jeer la daryeelo.

Haddii intaasi muran madoonto tahay, waxaa cad in aan iska hor imaad ku jirin diinta iyo hantiwadaagga cilmiga ku dhisan marka laga eego mid waliba wuxuu ka qabo horumarka binuu aadmiga iyo sinnaanta iyo caddaaladda.

Intaas haddaan niri waxaa lagama maarmaan ah in marka laga hadlayo ku dhiqidda mabda' hantiwadaagga ah lagu dhaqo dadkeenna la tix geliyo diinta islaamka oon ka hor imaanayn, sidii aan soo sheegnay mabda' bal ay suurawdo in marka sida saxa ah loogu fasiro qofka muslimka ah, wax badan oo tusahaya inay diintu diidan tahay isku dul noolaanshada iyo kadeedka qof la kadeedo laga heli karo.

Annagu halkakan u gelimeyno falsafada idealismada ah iyo tan materiyalismada ah farqiga u dhexeeya weligoodna ka dhexeeyn jirey umuuraha la xiriira materiya iyo idea fasirkooda aad baan u ogsoonnahay, falsafada materiyalismada iyo tan diiniga ah labadaba ragga ku fogaaday fasiraddooda iyo sarifkooda ayaan u deyneynaa, hase yeeshee nooma muuqato sabab loo daliishado diinta ama hantiwadaagga markisiga ah si loogula diriro midba kan kale mujtamaceenna maanta. Ninkii raba in u waaqica Soomaaliyeed oon joogno dadkayaga ka dhaadhiciyo in aan Ilaah jirin waa rajci, raba inuu kufiyo hantiwadaaga kana soo horjeediyo dadweynaha Soomaaliyeed mabda' dhankii laga eegaba danta u ah. Kan kale oo kitaabgaablaha ah ee ku warrama in hantiwadaaggu yahay diin la'aan iyo ilaah la'aan asana waa rajci gaboobay oo raba in uu ku gabbado diinta asagoo ku hoos jira hutaaf been ah, raba in uu dadka ku diro mabda.

Maangaab rajciya oo bidix ka yimid iyo mid la mida oo midig ka yimid ugu dambeysta marka la miisaamo waxba is-

ma dooriyaan, labadubana waa ka fog yihiin waaqica runta ah oo Soomaaliyeed, waana ka dhan danta guud oo ummadda iyo dhismaha hantiwadaagga. Waxaa lagama marmaan ah in lays ka ilaaliyo qar iska tuurka waddada looga leexdo bohol bidix ku taal iyo mid midig ku taal labadaba.

Qofkii aan garan sidii laysu waafajin lahaa mabda' iyo xaqiiqada waaqica ah oo ummaddu ku sugan tahay, waxaa waajib ah in la garansiiyo oo la hanuuniyo ayadoo aan la qoonsan oo lagu nicin aqoon yaridiisa, ama aragti gaabnida ka imaan karta waxa qofku yaqaan hadduu waafajin waayo runta dalkiisa taal, asagoo ku sifoobahaya hindiso iyo hawo been ah qof tiig sanahaya. Qofkii qaadan waaya hanuuninta ama iska dhega tira wanaagga iyo waxa san asagoo u dan leh in uu dadka ka dhex abuuro khilaaf iyo iska hor imaad, kuwaasoo ka dhan ah dhabbada cad oo mabda' hantiwadaagga lagu yaqaan, waxaa cad aan shakina lahayn in uu yahay qof ridoobay, dib u socod hor taagan halganka iyo horukaca Soomaaliyeed asagoo ku dhuumo is leh kuna gabbanahaya calanka hantiwadaagga ama kitaabgaablow diinta ku dhuumo is leh ayagoo labaduba been ka sheegahayaan arrimaha diinta iyo hantiwadaagga. Labadaas ridoobey midna hkayr iyo ijaabo uma leh mujtamaca Soomaaliyeed.

Diinta aqoonsigeeda iyo mabda' hirgelintiisa oo haddii si loo eego isku xiran ilaa xad, ninna lagu khasbi maayo ninkey la noqotaahi waa diidi karaa habka aan qaadannay hase yeeshee isaga iyo damiirkiisa waa wax ku xiran marnabase aan loo oggoleyn in uu isku dayo fidneyn uu mujtamaca Soomaaliyeed oo muslimka ah oo hantiwadaagga dhisahaya fidneeyo, asagoo isku dayahaya in uu maskaxdiisa jirran waxa ku jira oo ka fog danta Soomaaliyeed intuu faafiyo, ku habaabiyo dadweynaha. Waxaan ku soo gaba gabeyneynaa in aan dhismaha mabda' hantiwadaagga ah, iyo caqiidada islaamka oo dadka Soomaaliyeed rumaysan yahay marnaba iska soo horjeedin dalkeenna iyo wadcigeenna khaaska ah. Sidaa awgeed waxaan dhiseynaa mujtamac hantiwadaag ah oo diin leh.



Mabda' aan qaadannay oo qaba in si cilmiya loo baaro arrimaha mujtamaca la xiriira oo ah dhaqaale, xeer, iyo xamaas ayaa noo suuro geliyay in aan dersi buuxa iyo baarid dabadeed caddeyno : Hantiwadaag cilmi ah oon diideyn diinta islaamka weeye mabda' Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

*Waxaa lagu daabacay Wakaaladda Madbacadda Qaranka*

*Muqdisho — Setembar 1976*